TAARIIKH: 02/10/2017

SHARCI LR. Lr. 005
OGGOLAANSHO ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA ISGAARSIINTA QARANKA

MADAXWEYNAHA J.F.S,

**MARKA UU ARKAY**: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarfafka " C " ee Dastuurka KMG

**MARKA UU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka " f " iyo Qodobka 85aad ee Dastuurka KMG

**MARKA UU ARKAY**: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka Ref: 305/1/B-10/17 ee ku taariikheysan 18/09/2017 kuna saabsan ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA ISGAARSIINTA QARANKA ee ay ansixiyeen labada Aqal ee Baarlamaanka

**MARKA UU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo Sharci haga Isgaarsiinta Qaranka

**WUXUU SOO SAARAY SHARCIGAAN:**

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha JFS saxiixo Hindise Sharciyeedkan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday ansaxinta labada Aqal ee Barlamaanka ee Hindise Sharciyeedka Isgaarsiinta Qaranka oo noqonaya Sharci ka mid ah shuruucda Dalka.

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxaa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed

MUQDISHO: 02/10/2017

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane **Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)**

Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the Speaker

Ref: 305/1/B-10/17:الرقم

Mogadishu, 18th September 2017 التاريخ

**Ku:** **Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
**Muqdisho.**

---

**Ku:** **Guddoomiyaha Aqalka Sare**
**Muqdisho.**

---

**Ku:** **R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya**
**Muqdisho.**

---

**Og:** **Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada**
**Muqdisho.**

---

**Og:** **Guddiga Warfaafinta, Wacyigelinta, Dhaqanka, Boostada iyo Isgaarsiinta. L/H. Golaha Shacabka.**

---

**Og:** **Garyaqaanka Guud ee Dawladda.**
**Muqdisho.**

---

**Og:** **Hanti-Dhowrka Guud ee Dawladda.**
**Muqdisho.**

---

**Og:** **Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka**
**L/. Golaha Shacabka.**

---

**UJEEDDO:** **ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA ISGAARSIINTA QARANKA.**

M.ne Madaxweyne;

Si waafaqsan Qodobka 82-aad Faqradda 3-aad ee Dastuurka Federaalka waxaan halkan kugu soo gudbinaya Hindise Sharciyeedka ujeeddada ku xusan oo ay soo wada ansixiyeen Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.



Tell: +252 612224442/+252 615577472
E-mail: speaker@parliament.gov.so
Website: www.parliament.gov.so

Hindise Sharciyeedkan wuxuu si dhameystiran usoo maray habraacyada uu na farayo Dastuurka Federaalka iyo Qodobka 44-aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka.

Si aad ula socoto waxaan halkan kugu soo lifaaqay warbixin kooban oo faahfaahineysa marxaladaha ansixinta uu soo maray iyo dokumentiyada kale oo la xiriira. (arag lifaaqa).

Haddaba, M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan Qodobka 90-aad xarafka (f) ee Dastuurka JFS kaaga codsanaynaa in aad go'aanka BFS ku meelmariso Xeer-Madaxweyne, si uu Sharci u noqdo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jumhuuriyadda si waafaqsan Qodobbada 84-aad iyo 85-aad ee Dastuurka JFS.

Anigoo huba in waajibkaaga Dastuuriga aad ka gudan doonto, waxaad magaca Golaha Shacabka nooga guddoontaa salaan diiran iyo qaddarin gaar ah.

**M.ne Muxammad Sh. Cusmaan Jawaari**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya**

**Lifaaqa 1-aad:** Koobniin Marxaladaha iyo Habraaca uu soo maray Hindisaha
**Lifaaqa 2-aad:** Naqalka Asalka ah ee Hindise Sharciyeedka Isgaarsiinta Qaranka
**Lifaaqa 3-aad:** Warqadda Aqalka Sare ay dib ugu soo celiyeen Golaha Shacabka
**Lifaaqa 4-aad:** Warqadda Ansixinta Hindisahan loogu gudbiyey Aqalka Sare
**Lifaaqa 5-aad:** Warbixinta Guddiga Warfaafinta, Wacyigelinta, Dhaqanka, Boostada iyo Isgaarsiinta
**Lifaaqa 6-aad:** Warqadda uu ku soo gudbiyey R/Wasaaraha Xukuumadda FS
**Lifaaqa 7-aad:** Go'aanka Golaha Wasiirada ku ansixiyeen Hindisaha
**Lifaaqa 8-aad:** Warqadda Wasiirka u xilsaaran Hindisaha uu ugu gudbiyey R/Wasaaraha



**Tell:** +252 612224442/+252 615577472
**E-mail:** speaker@parliament.gov.so **Website:** www.parliament.gov.so

## ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA ISGAARSIINTA QARANKA

| Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya | |
|---|---|
| **Saxiix:** M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari" | **Taariikh:** 18th September 2017 |

| Guddoomiye Ku-xigeenka 1-aad ee Golaha Shacabka | |
|---|---|
| **Saxiix:** M.ne Cabdiweli Ibraahim Sh. Muudey | **Taariikh:** 18th September 2017 |

| Guddoomiye Ku-xigeenka 2-aad ee Golaha Shacabka | |
|---|---|
| **Saxiix:** M.ne Mahad Cabdalla Cawad | **Taariikh:** 18th September 2017 |

**Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya**
**Golaha Shacabka**
**Xafiiska Guddoomiyaha**

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

**Federal Republic of Somalia**
**House of the People**
**Office of the Speaker**

**Mogadishu,** 18th September 2017 التاريخ

## KOOBNIIN MARXALADAHA IYO HABRAACA UU SOO MARAY ANSIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA ISGAARSIINTA QARANKA.

1. Hindise Sharciyeedka Isgaarsiinta Qaranka waxaa soo curiyey Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoloojiyada, waxaana si waafaqsan Qodobka 80 (1) (a) ee Dastuurka Federaalka, Golaha Shacabka usoo gudbiyey 10/07/2017 Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka oo codsaday in sharcigan loo ansixiyo.

2. Markii ay taariikhdu ahayd 22/07/2017 waxaa Golaha Shacbiga Kalfadhigiisa 2-aad Kulankiisa 3-aad akhrinta koowaad ka jeediyey Wasiirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta.

3. Ka dib markii Guddiga Warfaafinta, Wacyigelinta, Dhaqanka, Boostada iyo Isgaarsiinta oo xilkan u abbaaran uu kasoo baaraandegay waxaa hindisahan la mariyey Akhrinta 1-aad, Akhrinta 2-aad iyo Akhrinta 3-aad si waafaqsan Qodobka 44-aad ee Xeer-Hoosaadka Golaha Shacabka, wuxuuna Goluhu Kalfadhigiisa 2-aad Kulankiisa 13-aad ee 9kii Agoosto 2017 ansixiyey Hindise Sharciyeedka ujeeddada sare ku xusan, oo aan u gudbinay Aqalka Sare si waafaqsan Qodobka 82 (1) (a) ee dastuurka si waajibaadkooda dastuuriga uga gudataan.

4. Taariikhdu markey ahayd 13/09/2017 Guddoomiyaha Aqalka Sare wuxuu Hindise Sharciyeedka Isgaarsiinta Qaranka dib ugu soo celiyey Golaha Shacabka ka dib markuu Aqalka Sare soo ansixiyey si waafaqsan Qodobka 82 (2) (a) ee Dastuurka Federaalka asagoo aan waxba laga beddelin.

5. Taariikhdu markey ahayd 14/09/2017 waxaa loo gudbiyey Guddiga Warfaafinta, Wacyigelinta, Dhaqanka, Boostada iyo Isgaarsiinta si uu uga soo hubiyo ugana soo baaraandego.

6. Guddiga wuxuu warbixintiisa oo loo mariyey Guddoonka Golaha Shacabka waxaa loo gudbiyey Kulanka Guud ee Golaha kuna wargeliyey in waxba laga soo beddelin ereyga "shacabka" uu Aqalka Sare ku soo daray Qodobka 10 (1) (c) ee Sharciga kan oo Golaha Shacbiga u arkay iftiimin siiqadeed keliya sidaasna uu mar kale wadaroggol ku ansixiyey markay taariikhdu ahayd 18/09/2017.

**Tell:** +252 612224442/+252 615577472
**E-mail:** speaker@parliament.gov.so **Website:** www.parliament.gov.so

Jam huuriyadda Federaal ka
Soomaaliya
Golaha Shacabka
Guddiga Warfaafinta, Wacyigalinta
Dhaqanka, Boostada & Isgaarsiinta

جمهورية الصومال الفدرالية
مجلس الشعب
لجنة الإعلام والثقافة والإتصالات

Federal republic of Somalia
House of the People
Committee of Information, Culture, Post & Telecommunication

---

TR: 17/09/2017

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka Federaalka.

Og: Guddoomiyaha Guddiga Warfaafinta iyo Isgaarsiinta

Og: Dhammaan Xubnaha Gudiga.

(1) Jibriil. Mahadsanid. Ka jeedi Golaha. 18/9/17.

Ujeeddo: Jawaabcelin Hindise Sharciyeedka Isgaarsiinta Qaranka.

M.ne Guddoomiye,

Annagoo tixracayna warqadda sumadeedu tahay **78/17** ee **13/09/2017** kana soo baxday Xafiiska Guddoomiyaha Aqalka Sare ee BFS kuna saabsaneyd soo gudbin Hindise Sharciyeedka Isgaarsiinta Qaranka oo Guddomiyaha Golaha Shacabka u soo gudbiyey Guddiga **14/09/2017** si ay u hubiyaan Guddiga waxyaalihii ay ka soo beddeleen Aqalka Sare.

Haddaba M.ne Guddoomiye markaan aragnay nuqulka Hindise Sharciyeedka Aqalka Sare noo soo gudbiyeen waxay wax ku kordhiyeen Qodobka 10 (1) (c) oo ay ka dhigeen **"1 (hal) xubin Bulshada Rayidka ah/Shacabka)** halka markii hore oo ahaan **"1 (hal) xubin Bulshada Rayidka ah)"**.

M.ne Guddoomiye waxaan halkan kugu soo lifaaqnay nuqulka asalka ah ee Hindise Sharciyeedka Isgaarsiinta Qaranka si loogu gudbiyo habraaca meelmarinta Madaxweynaha JFS.

Mahadsanid.

Xil. Jibriil Cabdirashiid Xaaji
Xoghayaha Guddiga

(2) Xog. Guud. A/yare. Haloo gudbiyo. 18/9/17.

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Aqalka Sare
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشيوخ
مكتب الرئيس

Federal Republic Of Somalia
The Upper House
Office Of The Speaker

Ref: 78/17 :الرقم                                                  Taariikh 13/9/2017 :التاريخ

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS

Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Og: Ra'isalwasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya

Og: Wasiirka Boostada, isgaariinta & Tignoolejiyada Somaaliya

Og: Garyaqaanka Guud ee Dowladda Federaalka Soomaaliya

Ujeeddo: Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka isgaarsiinta Qaranka

Mudane Gudoomiye,

Waxaa Sharaf ii ah in aan ku soo Celiyo sharciga isgaarsiinta qaranka kaas oo Guddoomiye ku-xegeenka 1aad ahaana ku-simaha guddoomiyaha golaha shacabka BFS Mudane Xildhibaan Cabdiweli Ibraahim Sheekh Muudey uu u-soo gudbiyay Golaha Aqalka sare sharciga isgaarsiinta Qaranka Taariikhdu Markey aheyd *12-Agoosto 2017* Summadeeduna ahayd *02/3/1/B-10/17* oo ay golaha shacabka ee BFS soo ansixiyeen *9 Agoosto 2017*.

Wuxuu golaha Aqalka sare BFS kalfadhigiisii 2aad Fadhigiisii 5aad uu u fadhiistey sida uu qabo qodobka 34aad ee xeer-hoosadka Golaha Aqalka Sare akhrinta koowaad uu ka jeediyey wasiirka boostada iyo isgaarsiinta Eng. Cabdi canshuur Xasan kadibna waxaa loo gudbiye Guddiga dhaqaalaha, maaliyada, ganacsiga, warshadaha, isgaarsiinta iyo dalxiiska Golaha Aqalka sare si ay uga soo doodaan ugana baarandagaan dib ugu soo celiyaan Golaha Aqalka Sare.

Ugu Dambeyn taariikhdu markay ahayd *21 Agoosto, 2017* Kalfadhiga 2-aad Fadhiyadiisa 6aad iyo 7aad Wasiirka Boostada & isgaarsiinta & Gugddigii loo xil saaray Arrinta Sharciga isgaarsiinta Qaranka, waxay Golaha Aqalka sare ka hor akhriyeen Akhrintii 2aad su-aalahii ka soo baxayna waxaa si wada jir ah uga jawaabay wasiirka boostada iyo isgaarsiinta & Guddiga dhaqaalaha, maaliyada, ganacsiga, warshadaha, isgaarsiinta iyo dalxiiska Golaha Aqalka sare, waana la ogolaaday, kadibna waxay u gudbeen akhrintii 3aad kaasoo la ogolaaday.

BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYEED
XAFIISKA GUDDOOMIYA
GELID/RECEIVED
TAR: 13/9/2017
TIX: 0106
SIXIIX:

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Aqalka Sare
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشيوخ
مكتب الرئيس

Federal Republic Of Somalia
The Upper House
Office Of The Speaker

Ref: 18/17

Taariikh: 23/9/2017

**Goluhu wuxuu ku ansixiyay Hindise Sharciyeedka Kor ku xusan sida hoos ku cad:**

- Senatorada Ogolaaday **39 (Soddon iyo Sagaal)**
- Senatorada Diiday **0 (Eber)**
- Senatorada ka aamusay **0 (Eber)**

Mudane Gudoomiye, iyadoo la tixraacayo kulankeeni wadajirka ahaa Aniga, Adiga iyo Madaxweynaha aan ku yeelanay Guriga Madaxeynaha JFS Taariikhdu markay ahayd 07.09.2017 kuna Heshiinay inaan kuu soo celiyo Sharciga Isgaarsiinta Qaranka, Waxaan Kuu soo Celinayaa sharciga isgaarsiinta qaranka oo ay labada Aqal ee Barlamaanka 10aad JFS ay isku raaceen si aad uga qaadato wixii waajib ah ee kaa saaran uguna gudbiso Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

1. Lifaaqa Hindise Sharciyeedka Isgaarsiinta Qaranka

2. Lifaaqa Warqaddii Soo gudbinta ahayd uu Golaha Shacabka ku ansixiyay Hindise Sharciyeedka

Iga Guddoon Salaan Qiimo & Qadarin Mudan.

Gudoomiyaha Golaha Aqalka sare

Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi

KM-0 Degmada Shibis Benaadir Mogadishu-Somalia
Office landline +2521643620 Mobile +252-6-2399992
abdi.hashi@senate.gov.so - info@senate.gov.so - speaker@senate.gov.so

Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the Speaker

**Ref:** 0253/5/B-10/17:الرقم **Mogadishu,** 16th August 2017 التاريخ

Ku: Guddoomiyaha Aqalka Sare;
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya – Muqdisho

---

Ku: Guddoomiyaha Guddiga Warfaafinta, Wacyigelinta, Dhaqanka,
Boostada Iyo Isgaarsiinta Golaha Shacabka – Muqdisho

---

**UJEEDDO: GUDBIN HINDISE SHARCIYEEDKA ISGAARSIINTA SOOMAALIYA:**

M.ne Guddoomiye; Mudaneyaal;

Si aad ula socotaan, Hindise Sharciyeedka Isgaarsiinta Soomaaliya ee halkan ku lifaaqan waxaa soo curiyey Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta, waxaana si waafaqsan Qodobka 80(1) (a) ee Dastuurka Federaalka, Golaha Shacabka usoo gudbiyey Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka oo codsaday in sharcigan loo ansixiyo. Markii ay taariikhda ahayd 22.07.2017 waxaa Golaha Shacbiga Kalfadhigiisa 2-aad Kulankiisa 3-aad akhrinta koowaad ka jeediyey Wasiirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta.

Ka dib markii Guddiga Warfaafinta, Wacyigelinta, Dhaqanka, Boostada Iyo Isgaarsiinta oo xilkan u abbaaran uu kasoo baaraandegay soona mariyey habraaca sharcidejinta ku xusan Qodobbada 44-aad ee Xeer-Hoosaadka Golaha Shacabka, wuxuu Goluhu Kalfadhigiisa 2-aad Kulankiisa 13-aad ee 9ka Agoosto 2017 ansixiyey Hindise Sharciyeedka ujeeddada sare ku xusan, oo aan halkan idinku soo gudbineyno si waafaqsan Qodobka 82 (1) (a) ee dastuurka si waajibaadkiina dastuuriga u gudataan.

Taniyo intii ay Soomaaliya qaadatay nidaamka sharcidejinta laba-aqalleedka, Hindise-Sharciyeedkan waa kii ugu horreeyey oo ay Xukuumaddu naga soo codsatay in loo ansixiyo, ayadoo aanay weli noo dhamaystirnayn dejinta axkaamtii Xeer-hoosaadka lagu maarayn lahaa isla wada-hawlgalka labadeena aqal ee Baarlamaanka Federaalka. Saa daraadeed waxaan mar kale adkeynaya in, sida labada Guddi Joogto ee labada aqal horey ugu wada heshiiyeen, dedeg u hawlgalaan labada Guddi Xeer-hoosaad ee labada aqal ay si wadajir ah usoo dhamaystiraan cutubyada lagama maarmaanka ah ee loo baahan yahay in lagu kordhiyo xeer-hoosaadyadeena, si aan u yeelano nidaam cad oo lagu maareeyo habraaca ansixinta shuruucda iyo isla wada hawlgalka labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka.

Ilaa iyo inta aan ka yeelaneyno axkaamta xeer-hoosaadka labada aqal ku hawlgalayaan ee kor ku sheegan, waxaa ila habboonaatay in aan halkan idinku soo lifaaqo **Xusuusqor iyo xogwarran** ku faahfaahsan marxaladaha uu soo maray hindise-sharciyeedkan iyo habraaca lagu soo maareeyey ka hor inta Golaha Shacabku ansixin. Xusuusqorkan xogsiintaba waxaan ugu gol leenahay oo keliya si xubnaha Aqalka Sare ay xog ogaal u noqdaan iyo si ay idinku fududaato gudashada waajibaadkiina dastuuriga ah, si waafaqsan Qodobka 82 (2) ee Dastuurka Federaalka. Sidoo kale, si wadashaqaynta labada aqal aan uga dhigno mid si wax-ku-ool u falgasho, waxaan ku talineyna in Guddiga Aqalka Sare ee u xilsaaran arrimaha isgaarsiinta, haddii uu doorbido ama xog dheeraad ah uu uga baahdo, in uu toos ula xiriiro Guddiga Warfaafinta, Wacyigelinta, Dhaqanka, Boostada iyo Isgaarsiinta ee Golaha Shacabka. Guddoomiyaha Guddiga Boostada iyo Isgaarsiinta Golaha Shacabka, oo ogeysiis ahaan noo akhtisanayo, waxaa la faraya in uu si buuxda ula shaqeeyo Guddiga mataankiisa ah ee Aqalka Sare.

Haddii hindise Sharciyeedka Isgaarsiinta aan halkan idinku soo gudbinay uu Aqalka Sare sidiisa ku ansixiyo, asagoo aan wax wa-ka-beddel ah ku samayn, waxaan idinka codsanayna inaad noo soo gudbisaan Qaraarka aad ku ansixiseen, si aan ugu wargelino Golaha Shacabka, uguna gudbino dirno saxiixa iyo meelmarinta Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jumhuuriyadda, si waafaqsan Qodobka 82 (3) ee Dastuurka.

Haddise ay dhacdo in Aqalka Sare uu Hindisahan qodobbo ka mid ah ku samayo wax-ka-beddel ama uu gebi ahaantiisuba diido, waxaa markaas waajib noqonaysa in Aqalka Sare Qaraarkiisa Baarlamaaniga uu hindisaha ugu soo celinaayo Golaha Shacabka uu soo raaciyo Xusuusqor iyo xogwarran oo uu ku sababaynayo wax-ka-beddelka uu ku sameeye qodobka ama qodobbada hindisaha ama diidmadiisa gebi ahaaneed. Golaha Shacabku, inta aan Madaxweynaha loo gudbin ka hor waxaa markaas u bannaan waajib dastuuri ku ah, in uu hindisaha dib ugu noqdo si uu u guto xilkiisa dastuuriga ah, oo go'aan uga gaaro si waafaqsan Qodobka 82 (4) ama 82 (5) hadba middii la habboonata.

**M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawari"**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya**

Og: Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho

Og: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka
Muqdisho

Og: Wasiirka Boostada & Isgaarsiinta Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
L/H Xarunta Golaha Shacabka – Muqdisho

XUSUUSQOR Lr. 2 –
Ka: Guddomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya
Ku: Guddoomiyaha Aqalka Sare

**Taariikh: Muqdisho, 16/08/2017**

**Ujeeddo: Xogwarran lagu faahfaahinaayo marxaladaha iyo ansixinta uu soo maray Hindise Igarciyeedka Isgaarsiinta.**

Gogoldhig

Xusuusqorkan waxaa ku lifaaqan Hindise sharciyeedka Isgaarsiinta oo Golaha Shacabku ansixiyey.

Xusuusqorkan waxaa looga gol leeyahay keliya in lagu faahfaahiyo heerarka uu soo maray iyo habraaca Golaha Shacabku ku soo maareeyey si waafaqsan Qodobka 82 (1) ee Dastuurka Federaalka, iyo in Golaha Aqalka Sare la siiyo xogwarran waafi ah si ay ugu fududaato in ay waajibkooda dastuuriga ka gutaan si waafaqsan Qodobka 82 (2) ee Dastuurka. Marxaladaha uu soo maray Hindise Sharciyeedka

Hindise Sharciyeedka Isgaarsiinta wuxuu soomaray maraxaladaha soo socda:-

a) Hidisahan waxaa Baarlamaankii 9-aad loo soo gudbiyey 15/06/2014
b) Hindisaha markuu marayeye akhrinta 2-aad waxaa soo ifbaxday oo lagu cilladeeyey in uusan soo marin hay'adaha danleyda ah *(stakeholders)* oo ay ka mid yihiin shirkadaha mihnadda isgaarsiinta ka ganacsada, Dawlado-Goboleedyada, mihnadayahannada isgaarsiinta, bulshada rayadka ah iwm.
c) Hindisaha markii uu marayey akhrinta 3-aad, oo dhamaadka muddadii xilhaynta Baarlamaanka 9-aadna soo gudagashay, waxaa markay taariikhdu ahayd 20[ka] Agoosto 2016 hindisaha loo celiyey Xukuumadda Federaalka.
d) Xukuumadda Cusub ee Federaalka waxay markii ay taariikhdu ahayd 10.07.2017 Hindisahan usoo gudbisay Golaha Shacabka ee Baarlamaanka 10-aad;
e) Goluhu wuxuu Akhrinta 1-aad ka dhegeystay Wasiirka Boostada iyo Isgaarsiinta markay taariikhdu ahayd 22.07.2017. Kulankaas oo xildhibaanada fursad u siiyey inay Wasiirka ka xogwareystaan mashaakilka isgaarsiinta dalka ka jira oo sharcigan uu xaallinaayo haddii la ansixiyo iyo culayska maaliyadeed uu sanadka 1-aad ku kordhinayo miisaaniyadda qaranka, si waafaqsan Qodobka 44-aad Faqradda 4-aad ee Xeer-Hoosaadka Golaha Shacabka.
f) Waxaa kaloo xildhibaanadu u kuurgaleen kana waraysteen marxaladaha wadatashiga uu Hidisuhu soo maray. Wasiirku wuxuu Golaha ku wargeliyey sida soo socota:

I. In wasaaraddu abaabushay khubaro takhasus u leh arrimaha isgaarsiinta una gudbisay Hidise Sharciyeedkii Baarlamaanka 9-aad soo celiyey si ay u lafaguraan kana soo saaraan qabyoqoraal qalin-horaad ah;

II. Ka dib Wasaaraddu abaabushay dhegeysi latashi dadweyne ay ka qaybgaleen: Wasiirada Isgaarsiinta Dawlado Goboleedyada; Wakiillo ka socda shirkadaha isgaarsinta; aqoonyahanno ka socda Jaamacadaha qaranka; wakiillo mattalayey bulshada rayadka, kulankan oo socday min 06 – 08 Maajo 2017 lagu qabtay Muqdisho;

III. Taariikhdu markay ahayd 22.06.2017 waxaa Hidisahan ansixiyey Golaha Wasiiradda Xukuumadda Federaalka.

IV. 22.07.2017 Hindisaha waxaa loo gudbiyey Guddiga Warfaafinta, Wacyigelinta, Dhaqanka, Boostada Iyo Isgaarsiinta Golaha Shacabka.

V. Guddiga muddadii ka baaraandegidda Hidisaha wauxuu fursad u helay –

1. Cilmi-baaris kooban ku sameeyo arrimaha, ujeeddooyinka iyo nuxurka ku xusan Hindisuhu xambaarsan yahay;
2. In uu wada-xaajood la galo Wasiirka oo ay wehliyeen khubaro ka tirsan waaxyaha kala duwan ee wasaaradda; iyo,
3. In uu hubiyo hadalqoraallada wadatashiga wasaaraddu qabatay muddada ku xusan faqradda (f) (ii).

VI. Akhrinta 2-aad waxaa la qabtay 07.08.2017

VII. Guddiga wuxuu siiqo ahaan toosin ku sameeyey meelo badan, ayadoo la tixgelinaayo talooyinka iyo soojeedimaha xildhibaanada, wuxuu wax-ka-beddel ama wax-ku-kordhin ku sameeyey meelaha soo socda:

1. Qodobka 4aad waxaa lagu soo kordhiyey xilliga la dhisayo Gudiga isgaarsiinta Qaranka,
2. Qodobka 6aad, Faqradiisa 6aad isla Qodobka 6aad Faqradiisa 9aad iyo 10aad waan soo kala hormariney,
3. Qodobka 10aad faqradiisa 1aad xarafkiisa T waan kala Qeybiney Waxaana lagu daray xarafka J oo qeexaya hal xubin oo ka imanaya Bulshada Rayidka ah.
4. Qodobka 12aad faqradiisa 3aad oo qeexeysay ansixidda Fadhiga Hayadda Isgaarsiinta Qaranka oo ahayd (50+1) waxaan u bedelney ( 2/3) Seddex dalool laba
5. Qodobka 16aad waxaan waxka bedelney siiqada.
6. Qodobka 20aad, 29aad, 30aad waxaan ka bedelney xarfaha A, B, C.D oo aan u bedelnet B,T,J,X
7. Qodobka 31aad faqradiisa 1aad iyo 2aad waxaan waxka bedelney siiqada.
8. Qodobka 31aad faqradiisa 3aad waan tirney waxaan u aragney inaan looba baahneen
9. Qodobka 35aad faqradiisa 2aad waxaan waxka bedelney siiqada uu u qornaaa waxaana lagusoo darey TV yada iyo Isgaarsiinta dalka.

10. Qodobka 38aad waxaan ka bedelney xarfaha A,B,C.D oo aan u bedelnet B,T,J,X
11. Qodobka 42aad faqradiisa 3aad waxaan ka bedelney mudada lagu bixin karo Rukhsada oo ahayd 14 maalmood ayaan u bedelney 30 maalmood.
12. Qodobka 54aad faqradiisa 2aad waxaan kusoo darney inuu Qaranku leeyahay lambarada telefoonada ka sokow 252 oo furaha dalka ah.
13. Qodobka 58aad faqradiisa 1aad waxaan kusoo darney si waafaqsan sharciga maalgashiga dalka waxaa la ilaalinayaa xuquuqda dhamaan maalgashadayaasha.
14. Isla qodobka 58aad faqradiisa 2aad ayaan waxka bedel ku sameyney.
15. Qodobka 60aad faqradiisa 4aad ayaan wax ka bedel ku sameyney siiqaduu u qornaaa.
16. Qodobka 62aad faqradiisa 2aad ayaan wax ka bedel ku sameyney siiqaduu u qornaaa
17. Qodobka 63aad faqradiisa 3aad ayaan wax ka bedel ku sameyney siiqaduu u qornaaa

VIII. Akhrinta 3-aad waxaa la qabtay 09.08.2017 wuxuuna Golaha Shacabku Kalfadhigiisa 2-aad Kulankiisa 13-aad, oo ay goobjoog yihiin 159 xildhibaan codeynaya Hindisahan Sharciyeed ku ansixiyeen 158 Oggol ah - 1 diiday, ayadoo aysan jirin cid ka aamustay.

## 1 ARRIMAHA KA BAARAANDEGGA

Arrimaha ugu muhiimsana ee laga baaraandegay xilliyadii hindisuhu soo maray heerarka kala duwan waxaa ka mid ahaa kuwa halkan hoose ku xusan:-

a. Qodobka 4aad waxaa lagu soo kordhiyey xilliga la dhisayo Gudiga Isgaarsiinta Qaranka oo laga dhigey mudo 90 maalmood ah laga bilaabo markuu madaxweynaha saxiixo,
b. Qodobka 10aad faqradiisa 1aad xarafkiisa T waan kala qeybiney waxaana lagu daray xarafka J oo qeexaya hal xubin oo ka imanaya Bulshada Rayidka ah.
c. Qodobka 12aad faqradiisa 3aad oo qeexeysay ansixidda Fadhiga Hayadda Isgaarsiinta Qaranka oo ahayd (50+1) waxaan u bedelney (2/3) Seddex dalool laba

## 2 GUNAANAD

Haddii loo baahdo faahfaahin ama xog dherrad ah, waxaad si toos ah ula xiriiri kartaan M.ne Khaalid Macaw Cabduqaadir, oo ah Guddoomiyaha Guddiga Warfaafinta, Wacyigelinta, Dhaqanka, Boostada Iyo Isgaarsiinta oo aan horey u farnay in si buuxda idin kala shaqeeyo wixii aad uga baahataan, waxaadna kala xiriiri kartaan:-
Telefoon: 061 6982870, Email: macow62@hotmail.com

Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the Speaker

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Ref: 0247 /3/1/B-10/17:الرقم

Mogadishu, 12th August 2017 اريخ

Ku: Aqalka Sare Baarlamaanka JFS,
Xafiiska Guddoomiyaha Aqalka sare
Muqdisho.

---

Og: Guddiga Warfaafinta, Wacyigelinta, Dhaqanka, Boostada iyo isgaarsiinta.
L/H. Golaha Shacabka

---

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
L/H. Golaha Shacabka.

Ujeeddo: **Soo Gudbin Ansixinta Sharciga Isgaarsiinta Qaranka.**

M.ne Guddoomiye;

Waxaan kuu soo gudbinayaa nuqul Hindise sharciyeedka ku lifaaqan halkan ee "isgaarsiinta Qaranka" oo uu ansixiyay Golaha Shacabku kalfadhigiisa 2aad fadhigiisa 13aad, taariikhdu markay ahayd 9ka Bisha Ogosto 2017 si waafaqsan Qodobka 82-aad (1)(a) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Goluhu wuxuu ku ansixiyay Hindisesharciyeedka kor ku xusan Sidatan:-

- Xildhibaan Oggolaadeen: 158 (Boqol konton iyo Siddeed).
- Xildhibaan diidey: 1 ( Hal )
- Xildhibaan ka aamustay 0 ( Eber)

Mudane Guddoomiye, waxaan Aqalka Sare ka codsanayaa inay ka gutaan waajibaadkooda Dastuuriga ee kaga aadan Hindise sharyeedkan sida ku xusan Qodobka 82 (2) ee Dastuurka Soomaaliya.

Anigoo ku kalsoon inaad ka guddan doontaan waajibaadkiinna Dastuuriga ah, guddooma Salaan diiran iyo qadarin gaar ah.

M.ne Cabdiweli Ibraahim Sheikh Muudey,
Guddoomiye K/X/1aad Golaha Shacabka,
Ahna K/Simaha Guddoomiyaha Golaha Shacabka

MJ/

Tell: +252 612224442/ +252 615577472
E-mail. speaker@parliament.gov.so
Website: www.parliament.gov.so

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xukuumadda Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
الحكومة الصومال
مكتب رئيس الوزراء

*(The Government of Federal Republic of Somalia)*
Office of the Prime Minister

Tixraac: XRW/ O- 719 /06/2017 Taariikh: 22/06/2017

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka JFS =Muqdisho=

Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

Ujeeddo:- Soo Gudbin "Hindise-sharciyeedka Isgaarsiinta Qaranka"

**Mudane Guddoomiye,**

Iyada oo la tix-raacayo Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.11.06.17 ee 22/06/2017**, kuna saabsanaa ansixinta **"Hindise-sharciyeedka Isgaarsiinta Qaranka"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Sidaa awgeed, Mudane Guddoomiye, waxa aan halkan idin-kugu soo gudbinaynaa **'Hindise-sharciyeedka ujeeddada sare ku xusan'** si aad uga gudataan waajibaadkiina Dastuuriga ah; waxaan idinka codsanaynaa in aad fududeysaan ansixinta iyo meel-marinta **"Hindise-sharciyeedka Isgaarsiinta Qaranka"** maadaama baahi weyn loo qabo dhaqan-gelintiisa.

Mudane Xasan Cali Khayre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYEED
XAFIISKA GUDDOOMIYA
GELID/RECEIVED
TAR: 10/07/2017
TIX: 0075
SIXIIX:

+252-615-912780 E-mail: bashiiraxmed3@gmail.com or bashiiraxmed3@hotmail.com Mogadishu, Somalia

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xukuumadda Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
الحكومة الصومال
مكتب رئيس الوزراء

*(The Government of Federal Republic of Somalia)*
Office of the Prime Minister

Tixraac: XRW/ 0-15 /06/2017

Taariikh: 22/06/2017

Ku: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada =Muqdisho=
Og: Guddoonka Golaha Shacabka =Muqdisho=
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

Ujeeddo:- Go'aan Gole "Ansixinta Hindise-sharciyeedka Isgaarsiinta Qaranka"

Ra'iisul Wasaaaha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad (a), (b) & (c) ee Dastuurka Federaalka JFS.

Markuu arkay: Qodobka 100aad (a) iyo (d) ee Dastuurka JFS.

Markuu arkay: Warqadda summaddeedu tahay **WBIT/XW/0039/2017** ee **21/06/2017** ee soo-jeedinta Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoloojiyadda, kuna saab-sanaa codsi meel-marin hindise-sharciyeedka Isgaarsiinta Qaranka.

Markuu arkay: Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.11.06.17** ee **22/06/2017**, kuna saabsan ansixinta **"Hindise-sharciyeedka Isgaarsiinta Qaranka"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Markuu tixgeliyey: Baahida loo qabo u gudbinta Golaha Shacabka Hindise-sharciyeedka Isgaarsiinta Qaranka.

Wuxuu meel-mariyey:

## Qodobka 1aad

Go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.00.11.06.17 ee 22/06/2017**, kuna saabsan ansixinta **"Hindise-sharciyeedka Isgaarsiinta Qaranka"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

## Qodobka 2aad

In Hindise-sharciyeed Isgaarsiinta Qaranka si deg deg ah loogu gudbiyo Golaha Shacabka, si ay uga gutaan waajibaadkooda Dastuuriga ah.

**Mudane Xasan Cali Khayre**
**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

+252-61-5-912780 E-mail: bashiiraxmed3@gmail.com or bashiiraxmed3@hotmail.com Mogadishu, Somalia

**JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA**
Wasaaradda Boostada,
Isgaarsiinta & teknoloj.

Xafiiska Wasiirka

ةيروهمج لاموصلا
ةرازو ديربلا تلااصتلااو

ريزولا بتكم

Federal Republic of Somalia
**Ministry of Post, Telecommunications & Technology**
**Office of The Minister**

Tr. 21/06/2017

*Ref: WBIT/XW/0039/2017*

Ku: **Ra'isul Wasaaraha JFS**

Ujeedo: **Soo gudbin Hindise Sharciyeedka Sharciga Isgaarsiinta Qaranka**

Mudane Ra'iisul-Wasaare, Salaan iyo Qadarin ka dib,

Waxaa sharaf ii ah in aan kuu soo gudbiyo Qabyo-qoraalka Sharciga Isgaarsiinta Qaranka, kadib markii aan soo marinay habraac hufan ee la xiriira diyaarinta hindise-sharciyeedka kaas oo ah la tashiyo fara-badan oo aan kala sameyney dhamaan inta ay khuseyso oo ay ka mid yihiin Guddiga Warfaafinta & Isgaarsiinta ee Golaha Shacabka, Garyaqaanka Guud ee Dowladda oo gacan ka siinayey Wasaaradda diyaarinta Sharciga, Wasaaradaha Dowlad-goboleedyada Dalka, Shirkadaha Isgaarsiinta qeybahooda kala duwan ee Dalka oo dhan, Bahda waxbarashada oo ka faa'ideysta adeegga isgaarsiineed ee la xariira Tiknolojiyada casriga ah, iyadoo aan sidoo kale ka talo-geliney diyaarinta Sharcigaan Guddiga khubarada Sharciyaqaanada ah ee Wasaaradda Caddaladda Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliyeed.

Sidaas darteed, Mudane Ra'iisul-Wasaare, Waxaan kaa codsanayaa in Sharciga Isgaarsiinta Qaranka oo ku lifaaqan warqaddaan aad hor-dhigto Golaha Wasiirada si ay u meel mariyaan ka dibna aad u gudbiso Golaha Shacabka si ay u ansixiyaan maadaama Qaranimada Soomaaliyeed ay daruuri u tahay helidda Sharciga lagu hagayo Isgaarsiinta Dalka.

Mahadsanid.

Eng. Cabdi Cashuur Xasan
Wasiirka Wasaaradda Boostada, Isgaar[illegible]yada

Via Republic, Mogadishu, Somalia. Email: minister@mptt.gov.so

# Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

## SHARCIGA ISGAARSIINTA QARANKA

Sharci Lr: ____________ ee __________
Sharciga Isgaarsiinta Qaranka

## Qeybta 1-aad:
## Eray-bixin iyo ujeeddada Sharciga
### Qodobka 1-aad:
### Eray-bixin

1. **Hay'adda isgaarsiinta**: waxaa loola jeedaa hay'adda isgaarsiinta qaranka.
2. **Maareeyaha Guud**: waxaa loola jeeda maareeyaha guud ee ha'adda isgaarsiinta.
3. **Go'aan**: waxaa loola jeedaa go'aan qoran oo ay soo saartay hay'adda isgaarsiinta qaranka.
4. **Hab-dhaqan**: waxaa loola jeedaa xeerar, xeer-nidaamin iyo xeerarka nidaamiya rukhsadaha kala gadisan oo ay bixiso hay'adda isgaarsiinta.
5. **Rukhsadda**: waxaa loola jeedaa shatiyada (licenses) ay bixisay hay'adda Isgaarsiinta qaranka, ogolaanayana bixinta adeegyada isgaarsiinta si waafaqsan xeerkan.
6. **Rukhsad guud**: waxaa loola jeedaa ogolaanshaha awood baahsan ee isgaarsiineed sida hirarka shabakadaha iyo lambarrada qaranka.
7. **Rukhsadle**: waxaa loola jeedaa hay'ad (entity) walba oo leh rukhsad ay bixisay hay'adda isgaarsiinta qaranka.
8. **Furaha Qaranka**: waxaa loola jeedaa 252 (National code).
9. **Summadda Qaranka**: waxaa loola jeedaa Dot so (domain).
10. **Fiber Optic**: Waxaa loola jeedaa dhagaatiyaha xambaara internet-ka iyo Hirarka Isgaarsiinta.
11. **Hirarka Isgaarsiinta**: waxaa loola jeedaa qeyb kamid ah mowjadaha raadiyaha ee Hay'addu u qoondeysay adeegyada isgaarsiinta.
12. **Qorshaha Lambarrada Qaranka**: waxaa loola jeedaa shax Hay'adda Isgaarsiintu ku muujineyso qoondeynta tirada lambarrada talefoonnada.
13. **Adeeg-bixiye**: waxaa loola jeedaa shirkad ay u sharciyeysay Hay'adda Isgaarsiintu inay adeeg isgaarsiin bixiso.
14. **Wada-tashiga Bulshada**: waxaa loola jeedaa qaab wada-tashi oo ku saleysan hab-muuqda oo Hay'adda Isgaarsiintu ku ururiso xogaha la xiriira Hormarinta Isgaarsiinta.
15. **Dadweynaha**: waxaa loola jeedaa dadka waxgaradka ah sida culimaa'udiinka, aqoonyahanada iyo bulshada rayidka ah.
16. **Helitaanka Guud ee Adeegga Isgaarsiinta**: waxaa loola jeedaa helitaanka adeeg isgaarsiineed dhammaan macaamiisha isgaarsiinta, iyadoo aan loo eegin degaan fog ama dhow.

**Qodobka 2-aad:**

**Ujeeddada & Magaca Sharciga**

1. Sharcigan waxaa lagu magacaabaa sharciga Isgaarsiinta Qaranka, ujeeddadiisuna waa:
    a. Inuu horumariyo siyaasadda Isgaarsiinta Qaranka.
    b. Inuu abuuro xeer-nidaaminta Isgaarsiinta ee lagu maamulo dhammaan qeybaha Isgaarsiinta ee ka jira dalka.
    c. In lagu dhisay hay'adda isgaarsiinta qaranka.
2. Ujeeddada gaarka ah ee sharcigan waa xeer-nidaaminta iyo fududeynta tiknoolojiyada iyo adeegyada isgaarsiinta oo ay kamid yihiin:
    a. Sahlidda iyo mideynta adeegyada ku lammaansan isgaarsiinta.
    d. Horumarinta isgaarsiinta casriga ah si kor loogu qaado wacyiga bulshada iyo isticmaalka adeegyada internet-ka.
    e. Ilaalinta xafididda xogta gaarka ah ee shaqsiga.
    f. Fududeynta horumarinta iyo isticmaalka dhamman hirarka
    g. Fududeynta iyo abuuridda iibka casriyeysan ee ku saleysan adeegga isgaarsiinta.
    h. Maareynta suuqa furan ee adeegyada isgaarsiinta oo leh tartan xor ah.
    i. Bixinta rukhsadaha iyo sameynta xeer-nidaaminta isgaarsiinta.
    j. Horumarinta suuq furan, firfircoon, xorna ah ee qeybaha isgaarsiinta soomaaliya horumarinayana xoriyadda hadalka iyo isdhaafsiga fikradaha.
    k. Fududeynta iyo dhiirigelinta maalgashiga adeegyada isgaarsiinta, iyadoo tixgelin la siinayo shirkadaha waddaniga ah.
3. Wasaaradda iyo hay'addu waxay aqoonsanayaan dhammaan heshiisyadii ka horeeyay xeerkan oo ay galeen shirkadaha isgaarsiinta wadaniga ah oo waa faaqsan shuruucda dalka.

**Qodobka 3-aad:**

**Awoodda Sharciga**

1. Sharcigani wuxuu maamuli doonaa dhammaan Qeybaha isgaarsiinta ee ku jira soohdimaha Soomaaliya marka laga reebo Isgaarsiinta ay isticmaalaan Ciidamadda.
2. Sharcigan waxaa lagu ilaalinayaa horumarinta adeegyada Isgaarsiinta iyada oo loo eegayo baahiyaha bulshada iyo kuwa dhaqaale ee Soomaaliya.
3. Sharcigan waxaa lagu dhaqayaa laguna illaalinayaa xuquuqda shirkadaha Isgaarsiintaiyo adeegyada la xiriira.

## Qeybta 2-aad:
## Asaasidda Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka
### Qodobka 4-aad:
### Asaasidda Hay'adda

Si loo gaaro ujeeddada ku xusan qodobka 2aad ee sharcigan, waxaa xeerkan lagu dhisay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo mas'uul ka noqonaysa maamulka iyo nidaaminta Isgaarsiinta dalka. Taas oo lagu dhisayo muddo sagaashan (90) cisho gudahood kadib marka uu saxiixo Madaxweynaha laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

### Qodobka 5-aad:
### Xarunta Hay'adda

Xarunta Hay'addu waa magaala madaxda Soomaaliya ee Muqdisho, hase yeeshee waxay xafiisyo ku yeelan kartaa Maamul-goboleedyada dalka, haddii loo baahdo.

### Qodobka 6-aad:
### Awoodda iyo waajibaadka Hay'adda

1. Hay'addu waxay yeelaneysaa awoodda maamul ee isgaarsiinta qaranka, sida rukhsad bixinta iyo xeer-nidaaminta adeegyada isgaarsiinta dhammaan soohdimaha Soomaaliya si waafaqsan sharcigan.
2. Ka sokow arrimaha ku xusan faqradda kowaad, Hay'addu waxay awood u yeelanaysaa fulinta arrimaha soo socda:
    a. Waxay geli kartaa heshiisyo, qaadan kartaa deyn iyadoo la raacayo nidaamka maaliyadeed ee dalka.
    b. In ay yeelato, haysato, gadato, kireysato hanti guurta ah ama ma-guurta ah si waafaqsan sharciga maaliyadeed ee Qaranka.
3. Talo-bixinta, diyaarinta xeer-hoosaadyada la xiriira Qeybaha Isgaarsiinta, kana qeyb-qaataan fulintooda, iyadoo hay'addu la-tashanaysa dhinacyada ay quseyso (wasaaradda iyo adeeg-bixiyeyaasha).
4. Soo-saaridda xeer-nidaamiyeyaal iyo go'aanno lagama-maarmaan u ah fulinta xilkeeda iyo sharcigan, kuwaas oo ay ka mid yihiin, xeerarka aasaasiga ah ee farsamo ee hay'adda.
5. Bixinta rukhsadaha iyo soo-jeedinta canshuuraha la xiriira maareynta hirarka, kala-soocidda xisaabaha, isku-xirka, la-socodka shabakadaha iyo adeegyada isgaarsiineed.
6. Talo-ka-bixinta qiimaha tariifadaha, lambarrada iyo kobcinta tartanka Isgaarsiinta.
7. Xallinta khilaafaadka shirkadaha iyagoo u saaraya guddiyo farsamo oo dhexdhexaadiya.
8. Ilaalinta xuquuqda macaamiisha, iyadoo si gaar ah loo eegayo:-
    a. Ilaalinta sirta macaamiisha iyo xogaha adeegga;
    b. Tariifada Adeegga;
    c. Suurta-galnimada iyo helidda adeegga; iyo

d. Tayada iyo heerka adeegga.

9. diyaarinta shuruudaha, hal-beegga, iyo habka loo bixinayo shatiyada shabakadaha, adeegga Isgaarsiinta iyo isticmaalidda mowjadaha iyada oo aan waxba loo dhimayn shuruudaha sharcigani jideeyey.

10. Hay'addu in ay qaaddo talaabooyinka lagama-maarmaanka u ah si loo xakameeyo ciddii jebisa ama ku xad-gudubta xeerkan.

**Qodobka 7-aad:**
**Madax-bannaanida Hay'adda**

1. Hay'adda Isgaarsiinta Qaranku waa Hay'ad madax bannaan marka ay gudaneyso waajibaadkeeda si waafaqsan sharcigan, wax faragalin ahna kuma sameyn karaan Hay'adaha kale ee Dawladda. Waxayna leedahay shaqsiyad qaanuuneed, awoodna u leh in ay wax ku dacwayso ama lagu dacweeyo magaceeda, iyadoo la raacayo qaabka loo difaaco ama loo dacweeyo hay'adaha dawladda.
2. Hay'addan, si la mid ah hay'adaha kale ee dalka, waxay maamul ahaan hoos tegaysaa Wasiirka Wasaaradda u xilsaaran isgaarsiinta dalka, hase yeeshee way u madax-bannaan tahay fulinta waajibaadka sharcigani u xilsaaray.

**Qodobka 8-aad:**
**Miisaaniyadda Hay'adda**

1. Miisaaniyadda Hay'addu waxay ka mid noqoneysaa miisaaniyadda guud ee dawladda, hase yeeshee waxaa laga siin karaa shaqaalaha Hay'adda lacag dhiirrigelin ah dakhliga ay ku soo xareeyaan qasnadda dhexe ee dawladda, dhiirri galintaas oo dheeri ka ah xuquuqaha kale ee mushaharka iyo gunnada.
2. Hay'addu waxay u madax-bannaan tahay maamulka miisaaniyaddeeda iyadoo raacaysa sharciga maamulka miisaaniyadda Dawladda.

**Qodobka 9-aad:**
**Qaab-dhismeedka Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka**

Qaab dhismeedka Hay'adda Isgaarsiinta Qaranku wuxuu noqonayaa sida soo socota:-

1. Hay'adda Maamulka (Board of Directors);
2. Maareeye guud;
3. Maare eye Ku-xigeen; iyo
4. Sidoo kale hay'addu waxay yeelan kartaa waaxyo kala duwan oo mid walba hawl gaar ah u xilsaaran tahay.

**Qodobka 10-aad:**
**Hay'adda Maamulka Cusub**

1. Hay'adda Maamulka waxaa uu ka kooban yahay sagaal (9) xubnood oo ka kala imaanaya.

a. 2 xubnood Wasaaradaa Boostada iyo Isgaarsiinta;
b. 3 xubnood (xirfadlayaal) ka imaanaya qaybaha (sector) isgaarsiinta dalka.
c. 1 (hal) xubin Bulshada Rayidka ah/Shacabka.
d. 1 (hal) Qareen oo ka imaanaya Xafiiska Garyaqaanka Guud; iyo
e. Maareeyaha iyo Ku-xigeenkiisa.

2. Xoghaynta Hay'adda waxaa noqonaya madaxa waaxda maamulka ee hay'adda, wuxuuna u qaabilsan yahay hadal-qoraalka shirka iyo xiriirinta Hay'adda, gaarsiinta xogaha dhammaan xubnaha Hay'adda, hase yeeshee ma ahan xubin ka tirsan Hay'adda.
3. Xubanaha Hay'adda Maamulka ayaa iska dhex dooranaaya qofka noqonaaya guddoomiyaha Hay'adda afartii sanaba mar.

## Qodobka 11-aad:
## Muddada Xil-haynta Hay'adda

Marka laga reebo Maareeyaha iyo ku xigeenkiisa, Xubnaha Hay'adda Maamulka waxay haynayaan xilka xubinimada muddo Afar (4) sano ah oo loo cusboonaysiin karo hal mar oo keliya.

## Qodobka 12-aad:
## Kulamada Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka

Hay'adda Isgaarsiintu waxay yeelan kartaa shir caadi ah iyo shir aan caadi ahayn haddii loo baaahdo, waxayna u dhici karaan sida soo socoto:

1. Kulamada caadiga ah ee Hay'addu waxay dhacayaan saddexdii billoodba mar, haddii aysan Hay'addu go'aansan in la qabto waqti ka dheer ama ka gaaban saddexdii biloodba mar.
2. Maareeyaha guud waxaa uu ka codsan karaa Hay'adda in ay isugu yimaadaan kulan deg deg ah, oo aan cadi ahayn haddii loo baahdo, sidoo kale haddii ay isku raacaan saddex meelood labo meel xubnaha Hay'addu in la qabto shir aan caadi ahayn.
3. Shirka wuxuu ku ansaxayaa marka ay ka soo Qeyb-galaan shan (5) ka mid ah xubnaha Goloha isgaarsiinta qaranka iyo Mareeyaha guud, waxayna go'aanka ku gaarayaan cod Sedex dalool laba 2/3 tirada guud ee xubnaha Hay'adda, xubin kastaana waxay xaq u leedahay in la soo gaarsiiyo ajendaha shirka ugu yaraan ka hor muddo 7 maalmood ah qabsoomidda Shirka.
4. Hay'addu waxay fadhiga ku marti-qaadi kartaa wasiirka wasaaradda iyo qof kasta oo ka soo qeyb-galkiisa ay u arkaan muhiim. Waxaana ka-reeban codeynta in uu ka qeyb qaato xubin aanan ka mid ahayn Hay'adda isgaarsiinta qaranka.

## Qodobka 13-aad:
## Mas'uuliyadda Hay'adda

Mas'uuliyiinta Hay'addu waxay mas'uul ka yihiin arrimaha soo socdo:

1. Inay meel-mariyaan miisaaniyadda iyo qorshe-hawleedka Hay'adda kaddib marka uu horkeeno Maareeyuhu.
2. Inay kor kala socdaan sida loo dhaqan-gelinayo sharcigan iyo Qorshaha wax-qabadka oo ay hore u meelmariyeen.
3. Inay ansixiyaan marka ay hay'addu u baahato inay qorato shaqaale ayadoo la tixgelinayaa baahida xirfadeed iyo miisaaniyadda Hay'adda.
4. Inay u gudbiyaan Wasaaradda warbixinta la xiriirto qaabka loo maamulo Hay'adda, markii laga codsado ama ay ayagu u arkaan lagama maarmaan.

**Qodobka 14-aad:**
**ShuruudahaXubinnimada Hay'adda**

Qof kasta oo xubin ka noqonaya Hay'adda Maamulka waxaa laga doonayaa shuruudo la mid ah kuwa lagu xiray madaxda Sare ee Hay'adda, waxayna xilkooda ku waayi karaan si la mid ah isla madaxda sare ee Hay'adda.

**Qodobka 15-aad:**
**Gunnada Xubnaha Hay'adda**

Shaqada Hay'addu waa shaqo waqti-dhiman, waxaana loo magacaabayaa dad shaqooyin kale haysta, waxayna yeelanayaan gunno marka ay shirayaan, waxaana lagu xadidi doonaa Xeer-hoosaadka Hay'adda, oo ay xaq u yeelanayaan in laga bixiyo wixii kharash ah ee lagu galo shirarka.

**Qodobka 16-aad:**
**Dalabka Macluumaadka**

1. Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka waxay xaq u leedahay inay ka hesho rukhsadlaha bixiya adeegga isgaarsiinta inuu ka caawiyo Macluumaad ay u aragto inay lagama maarmaan u tahay gudashada waajibaadkeeda waxna u dhibeyn xuquuqda gaar ah ee shaqsiga si waafaqsan sharcigan.
2. Hay'adda Isgaarsiintu waxay ilaalinaysaa sirta ganacsi iyo xogaha kale ee qarsoodiga ah oo ay ka soo ururiyeen shirkadaha si waafaqsan sharcigan iyo shuruucda kale ee dalka.

**Qeybta 3-aad:**
**Awoodda Shaqo-qorista Hay'adda**
**Qodobka 17-aad:**
**Awoodda Shaqo-qorista**

1. Sida ku cad sharcigan, Hay'addu waxay leedahay awood ay ku qorato shaqaale kasta ee ay u aragto in aan looga maarmin hawlaha Hay'adda, iyada oo la raacayaa sharciga shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda.
2. Hay'adda Isgaarsiintu waxay diyaarinaysaa, hirgalinaysaana hannaanka shaqo iyo shaqaale ee Hay'adda, gaar ahaan arrimaha ku saabsan mushaarada, gunnooyinka hawl-gabka iyo gunnooyinka kale.

3. Hay'addu waxay dib-u-eegis iyo tixgelin ku sameyn kartaa mushaaraadka iyo gunnooyinka la siiyo shaqaalaha si waafaqsan siyaasadda guud ee Dawladda.
4. Iska-hor-imaadka danaha is-diidan ee ku xusan qodobka 34aad ee sharcigan, waxaa lagu dabaqayaa dhammaan shaqaalaha oo ay ku jiraan xubnaha sare ee Hay'adda.

**Qodobka 18-aad:**
**Xuquuqda Shaqaalaha Hay'adda**

Dhammaan xuquuqda iyo waajibaadka shaqaalaha Hay'adda waxaa lagu dhaqayaa sharciga shaqaalaha rayidka ah ee dawladda.

**Qodobka 19-aad:**
**Qaabka Magacaabidda Madaxda Hay'adda**

Xubnaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka waxay ku imaanayaan sida ay ku yimaadaan saraakiisha sare ee Dawladda si waafaqsan Dastuurka iyo sharcigan.

**Qodobka 20-aad:**
**ShuruudahaMadaxda Hay'adda**

1. mas'uul kasta oo kamid ah Madaxda Hay'addu waa inuu yahay Soomaali.
2. deggan yahay dalka, da'diisuna aysan ka yarayn 30 (soddon) sano.
3. waa in uu dhimir ahaan fayo-qab yahay, isla markaana gudan karo waajibaadka shaqo ee loo igmaday.
4. waa in uusan lahayn fal-dembiyeed, isla markaasna noqdaa qof leh asluub wanaag iyo dhawrsanaan.
5. lahaadaa xirfad aqooneed oo heer jaamacadeed ah iyo waayo-aragnimo ugu yaraan 5 sano.
6. waa inuu leeyahay mid ama laba ka mid ah xirfadaha hoos ku qoran:

b. Aqoonta Sharciga;
t. Aqoonta Arrimaha Macaamiisha;
j. Aqoonta Isgaarsiinta;
x. Aqoonta Teknoolajiyada Casriga; iyo
Kh. Aqoonta Maamulka iyo Dhaqaalaha.

**Qodobka 21-aad:**
**ShuruudahaXulidda Maareeyaha Guud**

Ka sokow shuruudaha ku xusan qodobka 20aad, Maareeyaha Guud waa in uu leeyahay shahaado jaamacadeed ee heerka labaad (**Master's Degree**) ee ugu yaraan mid kamid ah cilmiyadan:

1. Isgaarsiinta, Teknonolojiyada iyo waxyaabaha la xiriira;
2. Maamulka iyo maareynta;
3. Shareecada/Qaanuunka; iyo

4. Dhaqaalaha.

**Qodobka 22-aad:**
**Mas'uuliyadda Maareeyaha Guud**

1. Maareeyaha Guud waa mas'uulka ugu sarreeya maamulka hay'adda isgaarsiinta qaranka.
2. Wuxuu mas'uul ka yahay hoggaaminta iyo fulinta hawl-maalmeedka Hay'adda, ilaaliyana in hay'addu ku sugnaato habsami-u-socodka si ay u gaarto ujeeddooyinka loo xilsaaray, dhaqan-gelinta sharciga iyo xeer-hoosaadka u degsan hay'adda.
3. Xiriirka Hay'adda iyo Hay'adaha kale ee dawladda ama kuwa gaarka loo leeyahay iyo inuu matalo, kuna hadlo magaca Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka.
4. Kormeeridda iyo illaalinta habsami-u-socodka hawlaha hay'adda loo xilsaaray.
5. Wuxuu horgeeyaa Hay'adda Maamulka Miisaaniyadda ku-talo-galka Hay'adda si ay uga doodaan kaddibna u ansixiyaan inta aan loo gudbin Wasaaradda Maaliyadda ayadoo la sii marinayo Wasaaradda u xilsaaran Isgaarsiinta.
6. Wuxuu horgeeyaa Hay'adda Qorshaha shaqo iyo higsiga Hay'adda waqtiga dhaw iyo waqtiga dheer ee hagaajinta iyo tayeynta qeybta teknooloojiyada.

**Qodobka 23-aad:**
**Mas'uuliyadda Maareeye Ku-xigeenka**

1. Wuxuu buuxiyaa kaalinta Maareeyaha marka uu maqan yahay ama ay ku yimaadaan duruufo ka hor-istaagi kara gudashada waajibaadkiisa.
2. Wuxuu qabtaa wixii kale ee uu Maareeyuhu u xilsaaro.

**Qodobka 24-aad:**
**Mas'uuliyadda Xoghaynta Hay'adda**

1. Wuxuu gaarsiiyaa xubnaha Hay'adda Maamulka, fariimaha loo baahan yahay kaddib markuu ka helo amar Maareeyaha.
2. Waa madaxa uga hooseeya Maareeyaha iyo ku-xigeenkiisa maamulka hawlaha xafiiska isla markaana ah isku-xiraha xafiiska iyo hay'adaha kale si waafaqsan xeerkan.
3. Wuxuu diyaariyaa ajendaha shirka Hay'adda Maamulka (Board of Directors) kaddib marka uu kala tashado Maareeyaha, isla markaana qoraa doodda shirka, isku-dubaridaa gaarsiiyaana xubnaha kale ee Hay'adda
4. Wuxuu keydiyaa, ilaaliyaana dokumentiyada Maamulka iyo xog-sireedka hay'adda.
5. Waa hawl-wadeenka xafiiska hay'addda marka ay maqan yihiin Maareeyaha iyo ku-xigeenkiisa, haddii aan cid kale si ku-meel-gaar ah loogu macaabin.

**Qodobka 25-aad:**
**Sababaha Lagu Waayi karo Xilka**

1. Madaxda sare iyo dhammaan shaqaalaha kale ee Hay'adda waxa ay xilka ku waayi karaan in looga qaado sida ay ku yimaadeen ama si waafaqsan sharciga shaqaalaha rayidka ee Dawladda.
2. Ka sokow arrinta ku xusan faqradda 1aad ee Qodobkan waxaa kale oo xilka lagu waayi karaa arrimaha soo socda:
   b. In ay geeri ku timaado;
   t. Is-casilaad uu u soo gudbiyo, hay'adduna aqbasho;
   j. Caafimaad-darro keeni karta gudasho la'aan waajibaadkiisa;
   x. xil-gudasho la'aan ama musuq uu ku sameeyey hawshiisa;

kh. Ku-xad-gudub xeerka isgaarsiinta iyo xeer-hoosaadyada hay'adda iyo shuruucda kale ee dalka; iyo

c. Xil-ka-qaadista xubnaha sare ee hay'adda waxaa loo marayaa si la mid ah qaabkii loo maray magacaabiddooda.

**Qeybta 4-aad:**
**Waajibaadka iyo wada-shaqeynta**
**Qodobka 26-aad:**
**Waajibaadka Wasaaradda**

Waajibaadka Wasaaradda, iyadoo la tashanaysa Wasaaradaha Isgaarsiinta ee Dawlad-goboleedyada waa:

1. diyaarinta, soo-bandhigidda siyaasadda guud iyo qorshaha isgaarsiinta dalka oo qaabaysan, iyadoo la tashanaysa dhinacyada ay khusayso.
2. horumarinta Istaraatijiyada siyaasadeed ee lagu fidinayo baaxadda adeegga isgaarsiinta si loogu dhiirri-geliyo horumarinta dhaqan-dhaqaale ee Dalka.
3. Dhiirri-gelinta shirkadaha isgaarsiinta wadaniga ah sidii loogu heli lahaa fursado waxbarasho, tacliin sare ee dhanka Isgaarsiinta iyo macluumaadka xiriirka la leh tiknooloojiyada.
4. Kormeeridda iyo la-xisaabtanka Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka.
5. Ku-wacyi-gelinta bulshada, macluumaadka aqooneed ee ku saabsan isgaarsiinta, helidda aqoonta teknoolojiyada casriga ah si ay uga qeybqaataan kobcinta dhaqaalaha, horumarinta bulshada iyo sare-u-qaadidda wacyiga iyo il-baxnimada bulshada.
6. Ilaalinta habsami-u-socodka adeegga Isgaarsiinta iyo internet-ka.
7. Kormeeridda Shirkadaha Isgaarsiinta Qaranka.

**Qodobka 27-aad:**
**Wada-shaqeynta Wasaaradda iyo Hay'adda**

1. Hay'adda Isgaarsiintu waxay qorsheynaysaa horumarinta Isgaarsiinta dalka, iyadoo ku salayneysa siyaasadda Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknolojiadda.
2. Wasiirka iyo Hay'adda waxay tixgelinayaan wixii ka soo baxay wada-tashiga guud ee dejinta, sameynta, wax ka bedelidda siyaasadda isgaarsiinta ee hay'adda sida ku xusan sharcigan.
3. Wasaaraddu marka ay gudanayso mas'uuliyaddeeda iyo xiriirka ay la leedahay Hay'adda Isgaarsiinta, waxay tixgelinaysaa ilaalinta madax-bannaanida Hay'adda Isgaarsiinta oo ku saabsan gudashada waajibaadkeeda iyo hirgelinta Sharcigan.

**Qodobka 28-aad:**
**Mas'uuliyadda Wasiirka**

Wasiirku ama cidii wakiil ka ah, ayagoo tixgelinayo Qodobada 26[aad] iyo 27[aad] ee Sharcigan, waxa uu yeelanayaa mas'uuliyadaha iyo shaqooyinka soo socda:

1. Sameynta, kormeerka iyo go'aan-qaadashada siyaasadda guud ee isgaarsiinta Dalka, taasoo ujeeddadu tahay kobcinta ilaha dhaqaalaha, isticmaalka adeega isgaarsiinta, sare u qaadidda iyo horumarinta adeega bulshada.

2. La-gor-gortanka iyo dhaqan-gelinta heshiisyada Isgaarsiinta Caalamiga ah, ee lagu galayo magaca Soomaaliya, heshiisyadaas oo lala gelayo Dawlado kale ama ururo caalami ah.
3. U-matalidda Soomaaliya golayaasha caalamiga ah ee looga hadlayo ama lagu gaarayo heshiisyada caalamiga ah ee ku saabsan Isgaarsiinta.
4. Ka caawinta Hay'adda ee dhanka hawl-gelinta iyo helidda dhaqaale lagu horumariyo qeybta (sector), helidda shaqaale xirfad u leh isgaarsiinta, qalabka, tababarrada iyo helidda xarumo ku haboon gudashada waajibaadka loo xilsaaray Hay'adda.

**Qeybta 5-aad:**
**Wada-tashiga Shirkadaha Isgaarsiinta**
**Qodobka 29-aad:**
**Habka Wada-tashiga**

1. Hay'addu waxay qaban kartaa: -
   b. Wada-tashiga hay'adda iyo Shirkadaha oo ah saldhigga wada- shaqeynta labada dhinac, si loo gaaro himilada iyo higsiga in la helo isgaarsiin leh hal-beeg caalami ah oo lagu baahiyo dalka, ayadoo laga wada shaqeynayo horumarinta iyo casriyeynta qeybta (sector).
   t. Hay'addu waxay qaban kartaa wada-tashi guud oo ku saabsan arrimaha ay u soo jeediso Wasaaraddu si loo gaaro qorshaha Dawladdu ka leedahay

Siyaasadda Guud ee Isgaarsiinta, haddii ay Hay'addu u aragto inaan looga maarmin shirkadaha.

2. Wada-tashiga loo qabanayo Shirkadaha, waxa uu noqonayaa mid u dhaco si daah-furnaan ah u jeedkiisuna yahay, sidii looga wada shaqeyn lahaa danta guud iyo dhisidda isku-kalsoonaan dhexmarta Dawladda iyo Shirkadaha ka shaqeeya qeybta (sector).
3. Waxaa ka reeban wada-tashiga arrimaha ku saabsan xog-shakhsiyeed u gaar ah macmiilka, waxaana wadaagi kara oo keli ah, adeeg-bixiyaha iyo Hay'adda marka ay khusayso arrimo la xiriira nabadgelyada guud, markastana waxaa mudnaanta kowaad la siinayaa ilaalinta sirta u gaarka ah macmiilka.
4. Hay'addu waxay ururinaysaa dhammaan fikradaha iyo talooyinka ka soo baxa wada-tashiga, waxayna ku soo saaraysaa nuqullo qoraal ah, waxaana lala wadaagi karaa shirkadaha, ciddii si gaar ah u danaynaysana waxaa la siin karaa nuqul kamid ah talooyinkii ka soo baxay wada-tashiga, ayadoo laga qaadaayo lacag ay u goyso Hay'addu, oo u dhiganta kharashkii ku baxay soo saaridda, ayadoo aan laga doonayn macaash ama faa'iido.

**Qodobka 30-aad:**

**Shuruudaha Wada-tashiga**

1. Hay'addu waxay u qaban kartaa wada-tashi, qeyb ahaan ama dhammaantiis, in loogu soo gudbinayo fikrado qaab-qoraal ah oo keliya.
2. Hay'addu waxay iclaamin kartaa shir wada-tashi iyadoo u diraysa ogeysiis shirkadaha ayadoo loo qorayo qaabkan hoos ku qoran:
   b. Waqtiga bilowga wada-tashiga;
   t. Soo-bandhigidda sababta wada-tashiga iyo macluumaadka looga baahan yahay in looga hadlo;
   j. Muddada ay furan tahay in la soo gudbiyo fikradaha oo ay la socdaan dhammaan wixii lifaaqyo ah ee la xiriira;
   x. Inay keenaan wixii qoraalo ah oo kaabaya ciddii daneyneysa inay soo dirto fikraddeeda;

kh. Wixii warbixin kale ah ee Hay'addu u arakto inay ku habboon yihiin

arrinta la rabo in laga hadlo (xaaladaas);

D. Hay'addu waxay hubinaysaa in ogeysiiska wada-tashiga la siiyo shirkadaha waqti ku filan; iyo

r. Talooyinka ka soo baxay wada-tashigii lala yeeshay Shirkadaha, waxay Hay'addu siinaysaa tixgelin hadba baahidii la isla gartay, ayadaoo la raacayo si waafaqsan habraaca sharcigan.

## Qodobka 31-aad:
## Bogga Internet-ka Hay'adda

1- Hay'addu waa inay sameysataa bog internet oo rasmi ah oo ay ku soo bandhigto dhammaan waxqabadka iyo adeegyada ay qabato.

2- Hay'addu waxay si ku muddaysan 90 maalmood gudahood ugu daabacaysaa dhammaan diiwaannada, qoraalada rasmiga ah iyo kuwa aan sirta ahayn ee laga soo saaray habdhaqanka shirkadaha si waafaqsan sharcigan.

## Qodobka 32-aad:
## Habka Go'aan-qaadashada Hay'adda

1. Hay'addu waxay hubinaysaa in dhammaan go'aannadeeda ay ku salaysan yihiin si daah-furanaan ah.
2. Hay'addu waxay u ogolaaneysaa shirkadaha inay ka qeyb-galaan wadatashiga iyo dhegeysiga cid kasta oo daneynaysa sida macaamiisha iyo dadwaynaha kale, isla markaana ka soo jawaab celinaysa arrimaha wadatashiga kuna salayn karta go'aannadeeda ayadoo tixgelinaysa danta guud si waafaqsan sharcigan isgaarsiinta.
3. Arrin kasta oo hortaala, hay'addu waxay ka soo saari kartaa jawaab qoraal ah, taas oo lagu sharxayo sababaha tallaabooyinka ay u qaaday iyo in ay ku salaysan tahay xaqiiqda macluumaadka hor yaal.
4. Go'aannada Hay'addu waxay noqon karaan tallaabo walba oo la jaan-qaadi karta duruufaha jira si waafaqsan Sharcigan.
5. Hay'addu waxay diidi kartaa talaabo kasta ama codsi kasta oo aan waafaqsanayn sharcigan, iyadoo sababaynaysa.

## Qodobka 33-aad:
## Dib-u-eegidda Go'aannada Hay'adda

1. Cid kasta oo ku noqotay dhibbane sabab la xiriirta tallaabooyinka ay qaaday ama go'aannada ay gaartay Hay'adda Isgaarsiintu, wuxuu ka codsan karaa Hay'adda inay dib-u-eegis ku sameyso go'aankeedii hore.
2. Dhammaan xaaladaha lagu codsanayo dib-u-eegista, waxay Hay'addu bixinaysaa ogeysiin oo ay ku gaarsiinayso cidda ay quseyso in go'aankii ay horay u gaartay Hay'addu dib-u-eegis laga soo codsaday, ayadoo la tixgelinayo dhammaan dhinacyada ay khuseyso.
3. Cid kasta oo ay waxyeello ka soo gaartay go'aan ay gaartay Hay'addu waxuu racfaan u qaadan karaa maxkamadda awoodda u leh.
4. Maxkamaddu waxay awood u leedahay inay ku raacdo, wax ka bedesho ama diido go'aankii Hay'adda si waafaqsan sharcigan iyo shuruucda kale ee dalka.

**Qodobka 34-aad:**

**Iska-hor-imaadka Danaha Is-diidan**

Madaxda sare ee Hay'adda iyo cid kasta oo ka tirsan shaqaalaheeda waxaa ka reeban ka shaqaynta arrin ka hor-imaanaysa ama saameyn ku yeelan karta go'aanka-ka-gaarista arrinta laga hadlayo iyo shaqada ay u hayaan Hay'adda, sida haddii arrintu saamayn ku yeelan karto:

1. Danahooda dhaqaale ee gaarka ah;
2. Danaha dhaqaale oo la xiriira xaasaskooda, qof kamid ah qoyskooda ama qaraabadooda;
3. Danaha dhaqaale ee shirkadahooda ganacsi ama qof uu shirkad la yahay;
4. Dano dhaqaale oo hay'ad walba oo uu ka yahay saamile, milkile guud, ma'suul ama wakiil;
5. Dano dhaqaale oo Hay'ad walba uu kula heshiiyey inuu la shaqeeyo ama kula ballamay in laga shaqaaleysiiyo ama uu wada-hadal shaqo kula jiro. Xaaladahaas oo kale haddii ay dhacaan, waa inuu labo midkood sameeyo:
    a. inuu ka cudur-daarto ka qeyb-galka go'aaminta arrimaha danahaas khuseeya ee Hay'adda hor yaal; iyo
    b. inuu iska wareejiyo asagoo sheegayo sababta.
6. Waxaa reeban in Maareeyaha Guud ama Xubin ka tirsan madaxda sare oo saameyn ku yeelan karo go'aanka Hay'addu ku yeesho lahaansho toos ah, shirkad hoos-tagta awoodda iyo arrimaha loo idmaday Hay'adda Isgaarsiinta.

**Qeybta 6-aad:**

**Maamulka Hirarka Isgaarsiinta**

**Qodobka 35-aad:**

**Qoondaynta iyo Bixinta Hirarka**

1. Wasaaradda waxay u idman kartaa Hay'adda Isgaarsiinta in ay u matasho shirarka hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa dawladaha deriska ah.
2. Hay'adda Isgaarsiinta ayaa ka mas'uul ah qorsheynta, maamulidda, qoondeynta iyo kormeeridda isticmaalka mowjadaha raadiyaha, tv-yada, internetka iyo Isgaarsiinta dalka.
3. Hay'adda Isgaarsiintu waxay awooddeeda ku dhaqan galineysaa Sharcigan, heshiisyada Isgaarsiinta lala galay gobolka iyo kuwa caalamiga ah, si waafaqsan Sharcigan.

**Qodobka 36-aad:**

**Maamulka Hirarka**

Ka sokoow awoodaha uu siinayo xeerka warbaahintu, wasaaradda warfaafinta, Hay'adda Isgaarsiintu iyadoo gudaneysa waajibaadkeeda ku saabsan maamulka hirarka raadiyaha waxay masu'uul ka tahay arimahan soo socda:-

1. Dhiiri-gelinta in loo isticmaalo mowjadaha hirarka raadiyaha qaab horumar nidaamsan iyo beekhaamin cilmiyeysan leh, si rukhsadda adeeg bixiyaha lasiiyay ugu filnaato qoondada mowjad hirarka ku aaday, una isticmaalo si waafaqsan qoondaynta hay'adda;
2. Bixinta rukhsadaha hirarka raadiyaha iyo muqaal aragga (TV);
3. Horumarinta adeegyo casri ah iyadoo la isticmaalayo hirarka raadiyaha;
4. Suurta-gelinta tartan ganacsi oo ku dhisan hufnaan iyo daah-furnaan marka la soo bandhigayo ama la bixinayo adeegga hirarka kuna dhisan maamulwanaag si waafaqsan Sharcigan; iyo
5. Ku-talo-galka iyo qorsheynta baahida hadda jirta iyo tan imaan doonta, iyo arrimaha kale ee loo arko inay lagama-maarmaan yihiin.

**Qodobka 37-aad:**
**Sugidda Macluumaadka Qoondeynta iyo Bixinta Hirarka.**

Hay'addu waxay dhawraysaa dhammaan macluumaadka la xiriira qoondeynta iyo bixinta Hirarka iyo macluumaad kasta oo Hay'addu is leedahay way u fiican tahay maareynta Hirarka, marka laga reebo macluumaadka la xiriira baahida Sugidda Amniga Qaranka. Waxayna ka dhigaysaa dhammaan macluumaadka lagu xusay qodobkan, kuwa u furan bulshada guud si ay u bartaan ama ugu noqdaan xog-ogaal, waxaana lagu daabacayaa dhammaan macluumaadka bogga internet-ka Haya'adda.

**Qodobka 38-aad:**
**Shaxda Qoondeynta iyo Bixinta Hirarka**

1. Hay'addu waxay qorsheynaysaa isla markaasna maamulaysaa shaxda qoondeynta iyo bixinta hirarka Qaranka si waafaqsan Sharcigan.
2. Hay'addu waxay aqoonsaneysaa hirarka isgaarsiinta ee ay shirkadaha hadda jira horay u isticmaalayeen ayada oo la waafajinayo Sharcigan.
3. Hay'addu waxay u qoondeynaysaa, siinaysaana hirarka, isticmaalayaasha soo socda:
    b. Hay'adaha Amniga Qaranka;
    t. Dab-demiska iyo badbaadada dadweynaha;
    j. Hay'adaha Warbaahinta; iyo
    x. Shirkadaha isgaarsiinta.
4. Wasaaraddu waxay ka dalban kartaa Hay'adda in ay u soo gudbiso shaxdii ay diyaarisay oo faahfaahsan.
5. Shaxdu waxay dhaqan-gal noqonaysaa marka ay ansixiso Hay'addu, waxaana lagu daabacayaa bogga internet-ka ee Hay'adda si dadweynaha ciddii doonayso uga ogaato xogtaas.
6. Iyadoo la tixgelinayo faqradda 2[aad] ee qodobkan hay'addu waxay dhawraysaa arrimaha la xiriira hirarka mowjadaha Isgaarsiinta dalka horay uga shaqeynayey ayadoo la waafajinayo Sharcigan.

**Qodobka 39-aad:**
**Nidaaminta Isticmaalka Hirarka**

1. Hay'addu waxay maamulaysaa hirarka raadiyaha iyo qoondeyntooda sida ku xusan sharcigan, ayadoo ujeeddeedu tahay ilaalinta ku-dhaqanka iyo hubinta in adeeg bixiye kastaa u isticmaalo ujeedaddii loo siiyay isla markaana ku ekaado hirka loo qoondeeyey.
2. Hay'addu waxay qaban kartaa wada-tashi furan sida ku cad sharcigan, ujeeddadiisuna tahay sidii loogu sameyn lahaa xeer-nidaamiye haga rukhsadlaha iyo isticmaalka hirarka.

**Qodobka 40-aa:**
**Khidmadda Isticmaalka Hirarka**

1. Cid kasta oo doonaysa inay isticmaasho Hir raadiyo, TV, Isgaarsiin iyo wixii la mid ah oo u baahan in loo isticmaalo hir mucayan ah, waxay qaadanaysaa Rukhsadda istcmaalka Hirarka. Ciddii hore u isticmaali jirtayna waa inay waafajisaa adeeggeeda Sharcigan.

2. Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ayaa xaddidaysa khidmadda laga qaadayo cidda qaadanaysa Rukhsadda, ayadoo kala tashanaysa Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Tiknoloojiyada, iyo Wasaaradda maaliyadda; waxaana tixgelin la siinayaa xaaladda adeeg-bixiyaha.

3. Khidmadda Hay'addu qaadayso sida ku cad Sharcigan waxay xaqiijinaysaa:
    a. Inay ka qeyb-qaataan adeeg-bixiyeyaasha ka ganacsada isgaarsiinta, kobcinta dhaqaalaha dalka iyo horumarinta Isgaarsiinta, laguna xaqiijinayo inay bulshadu ka faa'iidaysato dhaqaalaha ka soo baxa; iyo
    b. Khidmadda laga qaado adeeg-bixiyeyaasha waxaa lagu shubayaa khasnadda guud ee Dawladda si waafaqsan sharciga maamulka miisaaniyadda dalka.

**Qeybta 7-aad:**
**Rukhsadaha**
**Qodobka 41-aad:**
**Rukhsadaha**

1. Qofna kuma shaqeysan karo shabakad isgaarsiineed, isagoo isticmaalaya Hirarka Raadiyaha ee Isgaarsiinta, saldhig warbaahin ama bixin adeeg isgaarsiineed ee Soomaaliya gudaheeda, asagoo aan u haysan rukhsad adeegga isgaarsiinta ee uu bixinayo.
2. Hay'addu waxay bixin kartaa rukhsad isgaarsiineed oo oggolaanaysa bixinta adeegyo isgaarsiineed, qaab ku saleysan rukhsado gaar ah iyo rukhsado guud si waafaqsan shuruudaha rukhsad-bixinta iyo nidaamka Hay'adda u degsan.

3. Hay'addu waxay boggeeda internet-ka ku daabacaysaa adeeg-bixiyeyaasha isgaarsiineed ee u qalma rukhsahada guud iyo kuwa gaarka ah.
4. Hay'addu marka ay go'aaminayso cidda u qalanta Rukhsadaha guud, ama kuwa gaarka ah, waxay hubinaysaa in ciddii hore u haysatay rukhsadda bixinta adeeggaas oo kale, waqtiga go'aanka la gaarayo, in aysan wax dhibaato ahi ka soo gaarin go'aankaas.
5. Rukhsadlaha aan isticmaalin rukhsadda uu qaatay oo aan bixin adeeggii uu u qaatay muddo lix bilood ah, way ka dhacaysaa rukhsaddu magdhaw la'aan.

## Qodobka 42-aad:
## Habka Rukhsad-bixinta

1. Hay'addu waxay bixin kartaa Rukhsad guud ee adeeg isgaarsiineed iyadoo ku bixineyso muddo cayiman sida uu qabo Sharcigan.
2. Habka Codsiga rukhsadaha isgaarsiinta wuxuu noqonayaa mid qoraal ah, laguna soo hagaajinayo Hay'adda, iyadoo la raacayo qaabka ay Hay'addu u diyaarisay rukhsad bixinta, laguna soo lifaaqayo macluumaadka loo baahan yahay iyo caddeyn muujinaysa in la bixiyey khidmaddii codsiga, sida waafaqsan Sharcigan
3. Hay'addu waxay siinaysaa codsadaha jawaab qoraal ah go'aankii ay ka gaartey codsiga muddo 30 maalmood gudahood oo maalmo shaqo ah**,** kana bilaabata markii laga guddoomey codsiga.
4. Hay'addu hadday go'aansato inaysan siin codsadahaas Rukhsadda, waxay muddo 14 maalmood gudaheeda ah si qoraal ah ugu wargelinaysaa codsadaha, loona sharaxayaa sababaha go'aankeeda si faah-faahsan islamarkaasna waafaqsan Sharcigan iyo shuruucda kale ee Dalka**.**
5. Rukhsadda guud ee lagu bixiyey si sharcigan waafaqsan, haddii aan looga joojin Rukhsadlaha si qoraal ah, wuxuu ku jirayaa kuna shaqeeynayaa si sharci ah oo awoodeysan ilaa laga gaarayo waqtiga dhamaanshaha rukhsadda.
6. Rukhsadda ay bixisey Hay'addu si waafaqsan sharcigan, laguma wareejinkoro, lagamana iibin karo qeyb ama dhammaan shakhsi ama shirkad kale iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga helin hay'adda.

## Qodobka 43-aad:
## Bixinta Rukhsad Guud

1. Rukhsadda adeegga isgaarsiinta guud waxa loo bixinayaa habka rukhsad qaadashada guud.
2. Hirarka iyo lambarrada isgaarsinta.
3. Rukhsadda guud waxa la siinayaa codsadaha marka uu buuxiyo shuruudaha loo dejiyey bixinta rukhsadda guud, iyada oo hay'adda isgaarsiinta ka dalban karto xog dheeraad ah.
4. Codsadaha wuxuu buuxinayaa form-ka rukhsadda guud ee hay'addu diyaarisey

## Qodobka 44-aad:
## Muddada Rukhsadda Guud

Muddada rukhsada guud ee adeeg bixiye isgaarsiineed waxaa lagu nidaaminayaa Xeer-hoosaadka Hay'adda ayadoo lagala tashanayo Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada, isla markaana la tixgelinayo baaxadda adeeg bixiyayaasha.

## Qodobka 45-aad:
## Qiimaha Rukhsadda Guud

Qiimaha rukhsadda guud iyo wixii la xiriira sida lambarrada waxaa xadidayo Hay'adda kaddib marka ay kala tashato Wasaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknooloojiyada, ayadoo la tixgelinayo qaabka caalamka looga dhaqmo iyo duruufaha u gaarka ah dalka, waxaana la raacayaa nidaam maaliyadeedka dalka, haddii loo baahdo waxaa warbixin dheeraad ah laga waydiin karaa Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka.

## Qodobka 46-aad:
## Cusboonaysiinta Rukhsadda

1. Hay'addu waxay cusbooneysiineysaa Rukhsad marka uu Rukhsadlaha soo codsado, una hoggaansamay dhammaan shuruudihii hore ee lagu siiyey rukhsadda sida ku cad sharcigan iyo hab-nidaaminta Hay'adda.
2. Rukhsadluhu waa inuu soo codsadaa cusbooneysiinta inta aysan ka dhicin rukhsaddii hore.
3. Haddii rukhsadda ay ka dib dhacdo waqtigii loogu talagalay in lagu cusbooneysiiyo, rukhsadlaha waxaa loo tixgelinayaa duruufaha keeni kara dib u dhac sababeysan oo maangal ah, haddii la waayo duruuf cad oo sababeysan waxuu mudan doonaa ganaax sida ku cad xeer-hoosaadka hay'adda ee habraaca ganaaxa.
4. Haddii ay dhacdo in Hay'addu cusbooneysiin weydo codsiga, Rukhsadlaha wuxuu wadan karaa hawlahiisa shaqo si waafqsan shuruudihii horay loogu siiyey ilaa inta Hay'addu ka gaarayso go'aanka cusbooneysiinta
5. Markasta oo ay Hay'addu qaadanayso go'aan diidmo cusbooneysiin, ama ay saarayso ganaax rukhsadlaha jebiyey shuruudihii lagu siiyey rukhsadda si waafaqsan sharcigan, Hay'addu waxay ka gaaraysaa go'aan iyadoo ku soo gudbinaysa hab qoraal ah.
6. Cusboonaysiinta rukhsadda guud waxa loo marayaa habraaca rukhsadaha si waafaqsan sharciga.
7. Shirkadaha isgaarsiinta wadaniga ah ee ka shaqeynayey dalka ka hor inta aan la ansixin Sharcigan isgaarsiinta, hay'addu waxay u tixgelineysaa jiritaanka sharciyadooda, inta laga waafajinayo sharcigan.

## Qodobka 47aad:
## Ka-tanaasulidda ama Dib-u-soo-celinta Rukhsadda

Rukhsadlahu wuxuu u soo celin karaa Hay'adda rukhsaddiisa asagoo soo raacinaya qoraal ogeysiin waqti walba, si waafaqsan Sharcigan, waxayna soo-celinta rukhsaddu hirgelaysaa marka hay'addu hesho qoraalka rasmiga ah ee rukhsadlaha.

## Qodobka 48-aad:
## Kala-noqoshada Rukhsadda

Hay'addu waxay amar qoraal ah ku hakin kartaa ama ku soo ceshan kartaa rukhsaddii ay bixisay marka ay dhacaan xaaladahan soo socda:

1. Haddii Rukhsadluhu bixin waayo ganaax lagu saaray ku xad-gudubka sharciga isgaarsiinta ee lagu siiyey Rukhsadda, waxaana lagala noqon karaa rukhsadda;
2. Marka uu fulin waayo ama u hogaansami waayo xeer-nidaaminta ay soo rogtay Hay'adda si waafaqsan sharcigan waxaa hay'addu kala noqon kartaa rukhsadda;
3. Haddii uu ku qanci waayo rukhsadluhu go'aanka hay'adda ee kala noqoshada rukhsadda waxaa uu u dacwoon karaa maxkamadda awoodda u leh si waafaqan xeerka nidaamka garsoorka soomaaliyeed; iyo
4. Waxaa kale oo lagala noqon karaa rukhsadlaha haddii uu rukhsadluhu bixin waayo khidmadda ku waajibtay.

## Qeybta 8-aad:
## Isku-xirka Shabakadaha Adeegga Isgaarsiinta
## Qodobka 49-aad:
## Codsiga Isku-xirka

1. Isku-xirka adeegga Isgaarsiinta telefoonnada, waa dan guud, waxaana lagama-maarmaan ah in la isu furo khadadka shirkadaha kale duwan ee ka ganacsada adeegga telefoonnada, si loogu sahlo bulshada in ay isticmaalaan hal laf (SIM Card), oo ay kula xiriiri karaan dhammaan shirkadaha kale ee ka hawl-gala dalka.
2. Haddii adeeg-bixiye isgaarsiineed oo leh rukhsad adeeg uu ka codsado isku-xir shirkad kale oo adeeg isgaarsiineed bixisa, waxaa la waafajinayaa sharcigan isgaarsiinta iyo heshiiska u dhexeya labada shirkadood.

## Qodobka 50-aad:
## ShuruudahaIsku-xirka

1. Dhammaan isku-xirka shirkadaha waa inay noqdaan mid qoraal ah una hoggaansanaadaan qodobbada Sharcigan iyo xeer-nidaaminta hay'adda.

2. Shuruudaha isku-xirka shirkadaha isgaarsiintu waa inay marka hore ku heshiiyaan shirkadaha isku-xirmaya, hase yeeshee hay'addu way soo faragelin kartaa ayadoo kaashanaysa wasaaradda, waxaana la waafajinayaa sharcigan.

3. Haddii ay hay'addu aragto in heshiiska oo dhan ama qeyb kamid ah aysan waafaqsaneyn qodobbada sharciga ama hab-nidaamina Hay'adda, waxay go'aamin kartaa inay shirkaduhu soo waafajiyaan heshiiskooda Sharcigan iyo shuruucda kale ee dalka.

4. Haddii ay dhinacyadu gaari waayaan go'aan laysku raacsan yahay ama ku yimaado dib udhac heshiiskooda, Hay'addu waxay soo faragelin kartaa, go'aanna ka gaari kartaa arrinta la isku hayo ayadoo loo marayo si waafaqsan Sharcigan.

5. Haddii go'aanka hay'adda dhinacyada dhinac kamid ah ku qanci waayo, Wuxuu uga dacwoon karaa maxkamadda awoodda u leh.

6. Haddii shirkadi bixin waydo lacagta lagu yeeshay ee ka dhalatay iskuxirka shirkadaha, waxaa lagu dhaqayaa sharcigan, xeer-nidaaminta hay'adda iyo xeerka madaniga Soomaaliyeed.

**Qodobka 51-aad:**
**Diiwaan-gelinta Heshiisyada Isku-xirka**

1. Dhammaan shirkadaha adeegga bixiya waxay ka diiwaan-gelinayaan Hay'adda Isgaarsiinta heshiis walba oo isku-xiraya shabakadaha mudo 30 maalmood gudohood laga bilaabo maalinta la kala saxiixdo heshiiska.

2. Dhinacyada heshiiska waa inay u soo gudbiyaan Hay'adda heshiiska isku-xirka oo ay galeen Shirkadaha adeegga bixiya.

3. Kaddib marka Hay'addu qiimeeyso shuruudaha heshiiska isku-xirka iyo kharashka isku-xirka lagu heshiiyey in uusan waafaqsanayn Sharcigan ama hab-nidaaminta Hay'adda, waxay ka codsan kartaa dhinacyadda in dib loogu noqdo heshiiska, lana soo waafajiyo.

**Qodobka 52-aad:**
**Xeer-nidaaminta Isku-xirka**

1. Hay'addu waxay sameyn kartaa xeer-nidaamin la xiriirta isku-xirka shirkadaha.

2. Xeer-nidaaminta isku-xirka hay'adda waxay qeexeysaa arrimaha soo socda:

   a Waqtiga iyo wada-xaajoodka gunnaanadka heshiiska isku-xirka.
   b Tayada iyo heerka adeegga;
   c Habraaca loo qaadaayo tariifada;
   d Xafididda lahaanshaha gaarka ah;

e Xafididda xogaha ganacsiga;
f Fududeynta isku-xirka dhinacyada; iyo
g Xaddididda tariifada isku-xirka marka ay dhinacyadu ku heshiin waayaan.

**Qodobka 53-aad:**
**ShuruudahaJaridda Isku-xirka**

1. Dhinacyada galay heshiiska isku-xirka maka bixi karaan heshiiskooda ayagoon ka haysan ogolaansho qoraal ah Hay'adda.

2. Hay'addu waxay dhiirigalineysaa iskaashiga bixiyayaasha adeegga isgaarsiinta.

3. Haddii dhinacyadu ay ku heshiin waayaan arrimaha kor ku xusan Hay'adda Isgaarsiintu waxay ku sameyn kartaa fara galin lagu xalinayo arintaas iyadoo mudnaanta koowaad la siinayo danta guud.

**Qeybta 9-aad:**
**Qorshaha Lambar-bixinta Qaranka**
**Qodobka 54-aad:**
**Qoondaynta iyo Bixinta Lambarrada**

1. Waxa reeban in la isticmaalo lambarrada qaranka, iyadoo aan loo haysan rukhsad ay bixiysay Hay'adda Isgaarsiinta qaranka si waafaqsan Sharcigan

2. Furaha qaranka 252, lambarada taleefanada iyo Sumadda qaranka dot So (domain) waa hanti Dawladdu leedahay, waxaana u xilsaaran Hay'adda Isgaarsiinta qaranka, waxaana loo maamulayaa si waafaqsan Sharcigan, iyadoo la dhawrayo xeerarka caalamiga ah iyo kuwa gobolka.

3. Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka waxay qoondeyneysaa qaabka loo isticmaalayo lambarrada dalka, sidaa darted shirkad kasta oo isgaarsiineed waxay soo codsanaysaa in la'eg ama u dhiganta baahideeda.

4. Hay'addu waxay leedahay awood ay ku ilaaliso, kuna sameeyso xeernidaamiye habka loo isticmaalayo qorshaha qoondeynta iyo bixinta lambarrada Qaranka iyo shabakadda internet-ka, taasoo lagu isticmaalayo in lagu bixiyo adeegyo Isgaarsiineed.

5. Dhammaan adeeg bixiyayaasha leh rukhsad isgaarsiineed, waxay xaq u leeyihiin inay helaan lambarro baahidooda ku filan si ay u bixiyaan adeegyada isgaarsiinta, kaddib mark ay soo buuxiyaan shuruudaha, soona qortaan codsigiisa, sida ku cad sharcigan.

6. Sharcigani waxa uu qeexayaa habka diidmada qeyb ama dhammaan codsi la xiriira isticmaalka lambarrada iyo diiwaangalinta magaca shabakadaha bixiya adeegga internet-ka haddii ay dhacaan arrimaha soo socda:
    a. Haddii codsaduhu aanu haysan rukhsad uu ku bixin karo adeegga isgaarsiinta iyo internet-ka;
    b. Haddii codsigiisu aanu waafaqsanayn qorshaha lamabarradda ee heer qaran;
    c. Haddii ay muuqato in codsiga rukhsadluhu uusan waafaqsaneyn sharcigan iyo shuruudaha qoondeynta ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka;
    d. Haddii ujeeddada isticmaalka lambarrada la soo codsaday ay halis ku yihiin jiritaanka shirkadaha isgaarsiinta iyo amniga qaranka sida khiyaano (fraud); iyo
    e. Haddii ujeeddada loo soo codsaday lambarrada aysan ku caddeyn codsiga hay'adda loo soo gudbiyey.

**Qodobka 55-aad:**
**Diidmada Codsiga**

1. Haddii ay Hay'addu diiddo codsiga bixinta lambarrada ama diiwan-gelinta shabakadda adeegga Internet-ka sida waafaqsan Sharciga hay'adda, waxaa ay ku soo saaraysaa go'aan qoraal ah, iyadoo ku caddeynayaa sababta keentay diidmada codsiga.

2. Codsaduhu wuxuu ka codsan karaa Hay'adda inay dib-u-eegis ku sameyso go'aanka codsigiisa lagu diiday.

3. Codsaduhu dib ayuu u soo codsan karaa lambarrada ama diiwaan-gelinta shabakadda Internet-ka uu dalbanayo, isagoo dib-u-habeyn ku soo sameynaya qodabbadii iyo sababihii loogu diiday soona waafajinaya habraacyada Hay'adda.

4. Haddii ay Hay'addu markale diiddo codsiga, wuxuu codsaduhu u gudbin karaa dacwad maxkamadda awoodda u leh.

5. Waxaa reeban ogolaansho rukhsad la xiriirta lambarrada iyo diiwaan-gelinta shabakadaha internet-ka ee ku dhisan khiyaano (fraud).

6. Hay'addu waxay awood u leedahay in ay joojiso isticmaalka lambarrada iyo diiwaan-gelinta shabakadaha Internet-ka ee ku dhisan khiyaano (fraud).
7. Cid kasta oo isticmaasha lambarrada shabakadaha internet-ka ee ku dhisan khiyaano (fraud) waxaa loo cuskan karaa Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

**Qodobka 56-aad:**
**Xeer- nidaaminta Lambarrada**

Hay'addu waxay soo saari kartaa xeer-nidaamin lagu horumarinayo ujeeddooyinka Sharcigan, nidaaminta lambarrada iyo shabakadaha internet-ka, ayadoo la kaashanaysa Wasaaradda, isla markaana tixgelin la siinayo Siyaasadda Isgaarsiinta Qaranka.

**Qodobka 57-aad:**
**Liiska Lambarrada Adeegyada gaarka ah**

1. Hay'addu waxay awood u leedahay inay soo saarto xeer-nidaamin lagu dhaqayo lambarro adeegyo khaas ah oo ay adeeg-bixiyeyaasha laga doonayo in ay hirgeliyaan iyadoo la dhawrayo maslaxada guud iyo midda gaarka ah, sida lambarrada adeegga degdegga ah iyo kuwii kale ee loo arko in ay yihiin dan guud.

2. Haddii Hay'addu soo saarto go'aan ah in adeeg bixiyeyaashu ay siiyaan macaamiishooda adeeg lambar guud xaaladaha degdegga ah ee dhammaan Soomaaliya laga isticmaali karo si loo dhiirri-geliyo nabadgelyada guud, waxay adeeg-bixiyeyaashu bixinayaan lambarro degdeg ah oo khaas ah, kuwaas oo ka shaqeyn kara dalka oo dhan.

3. Hay'addu sidoo kale waxay qaadaysaa tallaabooyin lagu dhiirri-gelinayo in si degdeg ah loo hirgeliyo dhismaha kaabeyaasha qorshaha lambarrada degdegga ah, kuwaasoo u sahlaya dadweynaha in lagu isticmaali karo meel kasta oo gudaha Soomaaliya ka tirsan.

**Qeybta 10-aad:**
**Xuquuqda Shirkadaha Isgaarsiinta iyo Macaamiisha**
**Qodobka 58-aad:**
**Ilaalinta Xuquuqda Shirkadaha Isgaarsiinta Wadaniga ah iyo maalgashadayaasha**

1. Si waafaqsan shuruucda maalgashiga dalka Waxaa la dhiirri-gelinayaa, lana dhawrayaa xuquuqda shirkadaha isgaarsiinta waddaniga ah iyo guud ahaan maal-gashadayaasha isla markaana waxaa la ilaalinayaa xuquuqdooda iyo jiritaankooda.

2. Hay'adda waxay ka ilaalineysaa shirkadaha isgaarsiinta wadaniga ah in uu ku yimaado burbur sababtiisu tahay tartan sharci dara ah.

**Qodobka 59-aad:**
**Oggolaanshaha Hirarka iyo Qalabka Isgaarsiinta**

1. Hay'addu waxay bixinaysaa rukhsadda isticmaalka hirarka mowjadaha.

2. Hay'addu waxay leedahay ka-talo-bixinta iyo fududeynta agabka isgaarsiinta ee waddanka la soo gelinayo, kaasoo ay keensanayaan shirkadaha bixiya adeegga isgaarsiinta.

3. Hay'addu iyadoo hirgelineysa hawshan waxay qabaneysaa wada-tashi guud oo ay la yeelaneyso shirkadaha isgaarsiinta si ay iskula meel-dhigaan hay'adda loo aqoonsanayo hal-beegga sheybaarka qalabka isgaarsiinta; hay'adahaas oggolaanshaha ay bixiso oo laga aqoonsan yahay Soomaaliya.

4. Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka waxay diiwaan-gelineysaa, hay'adda loo aggolaaday in la siiyo rukhsadda hal-beegga sheybaarka qalabka isgaarsiinta; Shirkadaha isgaarsiinta dalka way soo-jeedin karaan in wax laga beddelo ama lagu daro hay'adda qalabka baarta.

5. Cid kasta oo wadani ah waa keeni kartaa qalabka isgaarsiinta, hase yeeshee waxaa uu dalbanayaa rukhsad uu ku keeno qalabka isgaarsiinta, wuxuuna raacayaa shuruudaha loo dejiyey, isla markaana wuxuu bixinayaa khidmadda loo qoondeeyey adeegga, waxaana xaddidaya Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka.

**Qodobka 60-aad:**
**Xaqa Marinka Adeeg-bixiyaha**

1. Rukhsadlaha bixiya adeegyada Isgaarsiinta wuxuu xaq u leeyahay in si waafaqsan sharciga loogu oggolaado dhex-maris uu dhex-marsado dhulka guud qalabkiisa, meel walba oo waddanka ka mid ah, marka uu dhisayo, dayactirayo ama ka shaqeynayo xarumaha looga baahan yahay gudashada waajibaadka rukhsadda loo siiyey si uu u bixiyo adeeg isgaarsiineed.

2. Rukhsadlaha bixiya adeegyada isgaarsiinta wuxuu xaq u leeyahay in si sharciga waafaqsan loogu oggolaado, una helo dhex-mariska uu marsado qalabkiisa dhulalka sida khaaska loo leeyahay, iyadoo oggolaansho iyo heshiis la weydiisanayo milkilaha isla markaana ay waajib ku tahay in uu aqbalo codsigaas, sida uu qabo sharciga isgaarsiinta qaranka.

3. Rukhsadlaha bixiya adeegyada isgaarsiinta waxa xaq loogu leeyahay in uu dayactiro dhibka uu u geystay hantida gaarka ah iyo tan guud.

4. Hay'addu waa iney soo rogtaa xeer-nidaamin lagu bixinayo mag-dhaw lagu hagaajinayo dhibkii ay geysatay isticmaalidda xaqa loo siiyey dhexmarsashada qalabka iyo kii loogu geystay, dhulka/hawada guud ama kan gaarka ah

5. Hay'addu waa iney soo rogtaa xeer-nidaamin lagu bixinayo mag-dhaw lagu hagaajinayo dhibkii ay geysatay isticmaalidda xaqa loo siiyey dhexmarsashada qalabka iyo kii loogu geystay, dhulka/hawada guud ama kan gaarka ah

.

6. Hay'addu waxay leedahay awood ay ku dhegeysato, go'aannana uga gaarto wixii is-afgaran-waa ah ee ka dhasha isticmaalka xaqa marinka ee Adeegbixiyuhu xaqa u leeyahay.

**Qodobka 61-aad:**
**Helitaan Adeeg Isgaarsiineed oo Baahsan**

1. Adeeg-bixiyeyaasha iyagoo kaashanaya Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka waxay u hawl-gelayaan in dadweynaha ay gaarsiiyaan baahida ay u qabaan isgaarsiinta gaar ahaan maagaalooyinka, tuulooyinka, miyiga iyo meel walba oo ay baahi isgaarsiineed ka jirto.

2. Hay'adda isgaarsiinta qaranka waxay iska xilsaaraysaa fududeynta iyo baahinta isgaarsiinta ay baahida u qabaan dadweynaha in ay helaan adeeg isgaarsiineed oo baahsan.

**Qodobka 62-aad:**
**Tartanka Suuqa Isgaarsiinta**

1. Waxaa u furan adeeg-bixiyeyaasha Isgaarsiinta tartan ganacsi oo xor ah, iyadoo aan la jebinayn sharciga isgaarsiinta.

2. Hay'addu waxay kormeeraysaa, go'aanna ka gaareysaa, iyadoo hubinaysa in dhammaan adeeg-bixiyeyaashu u hoggaansameen shuruucda tartanka xorta ah iyo habka uu u nidaamiyey sharcigan iyo xeer-nidaaminta Hay'adda iyadoo marwalba la ilaalinayo hannaanka cadaaladda.

3. Hay'addu waxay xaqiijineysaa adeeg-bixiyeyaasha Isgaarsiintu inay dhawraan tartanka suuqa xorta ah, xaqa lahaanshaha iyo maamulidda saldhigyada isgaarsiinta.

**Qodobka 63-aad:**
**Si-xun-u-isticmaalidda Awoodda Suuqa**

1. Waxaa ka-reeban Rukhsadle kasta oo bixiya adeeg isgaarsiineed oo ay Hay'addu oggolaatay, inuu ku kaco fal ujeeddadiisu tahay in lagu waxyeelleeyo tartanka suuqa xorta ah ee isgaarsiinta dalka.

2. Waxaa ka-reeban in Rukhsadle bixiya adeeg isgaarsiineed uu galo heshiis ama ballan-qaadyo, taasoo ujeeddadoodu tahay in hoos loo dhigo tartanka suuqa Isgaarsiinta dalka.

3. Haddii ay Hay'addu u aragto, kaddib dhageysi iyo wada-tashi loo qabtay adeeg-bixiyeyaasha si waafaqsan sharcigan, in rukhsadle Isgaarsiineed uu ku kacay falal ujeeddadoodu tahay khasaarin hantiyeed oo suuqa ganacsiga Isgaarsiinta ku yimaada, Hay'addu waxay qaadeysaa talaabooyinka soo socdo:
    b. Ku soo rogitaan ganaax lacageed oo ay Hay'addu xaddido iyadoo tixgelinaysa waxyeellada uu suuqa u geystay falkiisa sida ku cad Sharcigan; iyo

    t. Haddii Hay'addu u aragto in waxyeellada uu geystay falkaas ka dhalan karta dhibaato loo gaystay cid kale, waxaa loo gudbin karaa maxkamadda awoodda u leh si ay go'aan uga gaarto inta uu gaarsiisan yahay fal-dembiyeedkaas, ciqaabta ku habboon iyo in ay xaddido mag-dhawga ka dhalan kara khasaaraha uu geystay.

**Qodobka 64-aad:**
**Faaf-reeb**

Shirkaduhu waxay mas'uul ka yihiin anshaxa isticmaalka adeegga ay bixiyaan, waxayna faaf-reeb ku sameynayaan dadka u isticmaala waxyaabaha Diinta Islaamka iyo anshaxa suuban ka soo horjeeda, sida:

1. Waxaa anshaxa suuban cabbir u noqonaya dhaqanka suubban ee bulshada iyo mabaadi'da Shareecada Islaamka.

2. Wax kasta oo ka horimaanaya dhaqanka suubban ee bulshada iyo mabaadi'da shareecada Islaamka waa anshax-xumo, waxayna shirkaduhu ka qaadi karaan qofkii ku xad-gudba tallaabo anshax-marin ah oo gaari karta in laga xiro isticmaalka adeegga, haddii cidda ku xad-gudubtay joojin waydo isticmaalkaas ka soo horjeeda anshaxa suubban.

3. Shirkaduhu waxay si qoraal ah ku soo wargelinayaan Hay'adda go'aanka ama tallaabada ay ka qaadeen cidda geysatay xad-gudubka.

**Qodobka 65-aad:**
**Amniga Qaranka**

1. Waxaa waajib ku ah Rukhsadle kasta ilaalinta amniga qaranka, waana inuu fuliyaa codsiyada hay'adda iyadoo la raacayo shuruucda dalka.

2. Haddii ay jiraan baaris sababo la xiriira nabadgelyada qaranka, waxaa laga codsan karaa lambarka macmiilka, marka ay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ama hay'adaha Amnigu u soo dalbadaan si qoraal ah; haddii looga baahdo xog dheeraad ah, ayadoo loo marayo maxkamadda awoodda u leh; waxaana ku waajib ah rukhsadlaha in uu ilaaliyo sirta xogta laga dalbaday oo aysan gaarin cid kale.

3. Haddii loo baahdo baaris la xiriirta amniga qaranka waxaa la tixgelinayaaa duruufaha nabadgelyada dalka iyo ilaalinta xuquuqda gaarka ah ee muwaadinka.

## Qodobka 66-aad:
## Diiwaan-gelinta Lafta (SIM Card)

1. Shirkadaha Isgaarsiintu waxay diiwaan-gelinayaan dhammaan dadka iska leh Lafaha (SIM Cards) Telefoonka iyo kuwa la siinaayo Lafaha (SIM Cards) marka uu sharcigan dhaqan-galo, si loo sugo milkiyadda iyo xuquuqda gaarka ah ee macmiilka.

2. Si loo fuliyo tilmaanta ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan waxaa lagama-maarmaan ah in uu haysto macaamilku wax sugi karo aqoonsiga shakhsi.

## Qeybta 11-aad:

## Qodobka 67-aad:
## Hirgelinta Sharcigan

1. Hay'addu waxay leedahay awood ay ku hirgelinayso Sharcigan iyo xeernidaaminta hay'adda isgaarsiinta qaranka, hase yeeshee ayadoo la tixgelinayo duruufaha gaarka ah uu Dalku ku sugan Wasaaradda, Hay'adda iyo adeeg-bixiyayaashu waxay iska kaashanayaan sidii si buuxdo loogu hirgelin lahaa Sharcigan.

2. Hay'addu waxay leedahay awood ay ku kormeerto in loo hoggaansamay sharcigan iyo xeer-nidaaminta hay'adda ay soo saartay.

3. Hay'addu waxay raacaysaa qaab daah-furan, waafaqsanna sharciga isgaarsiinta qaranka.

4. Hay'addu waxay awood uleedahay in ay ganaax saarto ciddii jabiso sharcigan. Lana siiyo mag-dhaw cid walba oo ay dhibaato ka soo gaartay ku xad-gudubka sharcigan.

5. Hay'addu waxaa kale oo ay dhaqan-gelinaysaa heshiisyada caalamiga ah ama kuwa goboleed oo ay Soomaaliya qeyb ka tahay kuwaasoo la xariira arrimaha isgaarsiinta.

**Qodobka 68-aad:**
**Xaaladahii Ka Horreeyey Sharcigan**

Cidna laguma qaadi karo ganaax kasta oo ka dhashay falal ama talaabooyinka uu reebay saameyntooda Sharcigan falalkaasoo dhacay ka hor dhaqan-galkiisa, hase yeeshee waxaa la waafajinayaa sharcigan kaddib marka uu dhaqan-galo.

**Qodobka 69-aad:**
**Baabi'in**

Waxaa la baabi'iyey sharci kasta oo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin Sharcigan.

**Qodobka 70-aad:**
**Dhaqan-gal**

Sharcigani wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JFS, isla markaana lagu soo saaro faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

# Tusmo:

**Qeybta 1-aad: Eray-bixin iyo ujeeddada Sharciga ... 1**
Qodobka 1-aad: Eray-bixin ... 1
Qodobka 2-aad: Ujeeddada & Magaca Sharciga ... 2
Qodobka 3-aad: Awoodda Sharciga ... 2

**Qeybta 2-aad: Asaasidda Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ... 3**
Qodobka 4-aad: Asaasidda Hay'adda ... 3
Qodobka 5-aad: Xarunta Hay'adda ... 3
Qodobka 6-aad: Awoodda iyo waajibaadka Hay'adda ... 3
Qodobka 7-aad: Madax-bannaanida Hay'adda ... 4
Qodobka 8-aad: Miisaaniyadda Hay'adda ... 4
Qodobka 9-aad: Qaab-dhismeedka Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ... 4
Qodobka 10-aad: Hay'adda Maamulka Cusub ... 4
Qodobka 11-aad: Muddada Xil-haynta Hay'adda ... 5
Qodobka 12-aad: Kulamada Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ... 5
Qodobka 13-aad: Mas'uuliyadda Hay'adda ... 5
Qodobka 14-aad: Shuruudaha Xubinnimada Hay'adda ... 6
Qodobka 15-aad: Gunnada Xubnaha Hay'adda ... 6
Qodobka 16-aad: Dalabka Macluumaadka ... 6

**Qeybta 3-aad: Awoodda Shaqo-qorista Hay'adda ... 6**
Qodobka 17-aad: Awoodda Shaqo-qorista ... 6
Qodobka 18-aad: Xuquuqda Shaqaalaha Hay'adda ... 7
Qodobka 19-aad: Qaabka Magacaabidda Madaxda Hay'adda ... 7
Qodobka 20-aad: Shuruudaha Madaxda Hay'adda ... 7
Qodobka 21-aad: Shuruudaha Xulidda Maareeyaha Guud ... 7
Qodobka 22-aad: Mas'uuliyadda Maareeyaha Guud ... 8
Qodobka 23-aad: Mas'uuliyadda Maareeye Ku-xigeenka ... 8
Qodobka 24-aad: Mas'uuliyadda Xoghaynta Hay'adda ... 8
Qodobka 25-aad: Sababaha Lagu Waayi karo Xilka ... 9

**Qeybta 4-aad: Waajibaadka iyo wada-shaqeynta ... 9**
Qodobka 26-aad: Waajibaadka Wasaaradda ... 9
Qodobka 27-aad: Wada-shaqeynta Wasaaradda iyo Hay'adda ... 10
Qodobka 28-aad: Mas'uuliyadda Wasiirka ... 10

**Qeybta 5-aad: Wada-tashiga Shirkadaha Isgaarsiinta ... 10**
Qodobka 29-aad: Habka Wada-tashiga ... 10
Qodobka 30-aad: Shuruudaha Wada-tashiga ... 11
Qodobka 31-aad: Bogga Internet-ka Hay'adda ... 12
Qodobka 32-aad: Habka Go'aan-qaadashada Hay'adda ... 12
Qodobka 33-aad: Dib-u-eegidda Go'aannada Hay'adda ... 12
Qodobka 34-aad: Iska-hor-imaadka Danaha Is-diidan ... 13

**Qeybta 6-aad: Maamulka Hirarka Isgaarsiinta ... 13**
Qodobka 35-aad: Qoondaynta iyo Bixinta Hirarka ... 13
Qodobka 36-aad: Maamulka Hirarka ... 13
Qodobka 37-aad: Sugidda Macluumaadka Qoondeynta iyo Bixinta Hirarka. ... 14
Qodobka 38-aad: Shaxda Qoondeynta iyo Bixinta Hirarka ... 14
Qodobka 39-aad: Nidaaminta Isticmaalka Hirarka ... 15

Qodobka 40-aa: Khidmadda Isticmaalka Hirarka ........ 15
**Qeybta 7-aad: Rukhsadaha ........ 15**
Qodobka 41-aad: Rukhsadaha ........ 15
Qodobka 42-aad: Habka Rukhsad-bixinta ........ 16
Qodobka 43-aad: Bixinta Rukhsad Guud ........ 16
Qodobka 44-aad: Muddada Rukhsadda Guud ........ 17
Qodobka 45-aad: Qiimaha Rukhsadda Guud ........ 17
Qodobka 46-aad: Cusboonaysiinta Rukhsadda ........ 17
Qodobka 47aad: Ka-tanaasulidda ama Dib-u-soo-celinta Rukhsadda ........ 18
Qodobka 48-aad: Kala-noqoshada Rukhsadda ........ 18
**Qeybta 8-aad: Isku-xirka Shabakadaha Adeegga Isgaarsiinta ........ 18**
Qodobka 49-aad: Codsiga Isku-xirka ........ 18
Qodobka 50-aad: Shuruudaha Isku-xirka ........ 18
Qodobka 51-aad: Diiwaan-gelinta Heshiisyada Isku-xirka ........ 19
Qodobka 52-aad: Xeer-nidaaminta Isku-xirka ........ 19
Qodobka 53-aad: Shuruudaha Jaridda Isku-xirka ........ 20
**Qeybta 9-aad: Qorshaha Lambar-bixinta Qaranka ........ 20**
Qodobka 54-aadQoondaynta iyo Bixinta Lambarrada ........ 20
Qodobka 55-aad: Diidmada Codsiga ........ 21
Qodobka 56-aad: Xeer-nidaaminta Lambarrada ........ 22
Qodobka 57-aad: Liiska Lambarrada Adeegyada gaarka ah ........ 22
**Qeybta 10-aad: Xuquuqda Shirkadaha Isgaarsiinta iyo Macaamiisha ........ 22**
Qodobka 58-aad: Ilaalinta Xuquuqda Shirkadaha Isgaarsiinta Wadaniga ah iyo Maalgashadayaasha ........ 22
Qodobka 59-aad Oggolaanshaha Hirarka iyo Qalabka Isgaarsiinta ........ 22
Qodobka 60-aad: Xaqa Marinka Adeeg-bixiyaha ........ 23
Qodobka 61-aad: Helitaan Adeeg Isgaarsiineed oo Baahsan ........ 24
Qodobka 62-aad: Tartanka Suuqa Isgaarsiinta ........ 24
Qodobka 63-aad: Si-xun-u-isticmaalidda Awoodda Suuqa ........ 24
Qodobka 64-aad: Faaf-reeb ........ 25
Qodobka 65-aad: Amniga Qaranka ........ 25
Qodobka 66-aad: Diiwaan-gelinta Lafta (SIM Card) ........ 26
**Qeybta 11-aad: ........ 26**
Qodobka 67-aad: Hirgelinta Sharcigan ........ 26
Qodobka 68-aad: Xaaladahii Ka Horreeyey Sharcigan ........ 27
Qodobka 69-aad: Baabi'in ........ 27
Qodobka 70-aad: Dhaqan-gal ........ 27